HERITAGE INSTITUTE

# WAX KA BEDDELKA WAAXDA BANGIYADA SOOMAALIYA, SI LOO DARDARGALIYO KOBACA DHAQAALAHA: XAALADDA IYO TUBTA HIMILOOYINKA HORUSOCODKA

SOMALI BANKERS ASSOCIATION

AGRO BANK

Amal Bank

Amana Bank

GALAXY INTERNATIONAL BANK
Serving To Empower You

BB Bank
Bushra Business Bank

DARYEEL BANK
Daryeelaha Danaha Bulshada

SOM BANK
Bank for all

Idman Community Bank
Growing Together

Dahabshil Bank International

بنك سلام الصومالي
SALAAM SOMALI BANK

IBS Bank
Empowering you

premier bank

myBank
Wherever you go

June 2023

# Tusmada


| | | |
|---|---|---|
| 1 | Hordhac | 4 |
| 2 | Habraaca Daraasadda | 5 |
| 3 | Sooyaalka | 6 |
| 4 | Horumarinta waaxda bangiyada Soomaaliya | 22 |
| 5 | Gunaanad | 26 |
| 6 | Talabixinno Siyaasadeed | 27 |

## Ku saabsan Qoraaga

**Dr. Uways Cali** waa cilmibaadhe ruugcaddaa ku ah dhaqaalaha iyo Siyaasadda Horumarinta Bulshada, waxaanu ka hawlgalaa Machadka Heritage. Inta badan waxa uu xoogga saaraa daarasadaha ku saabsan dhaqaalaha guud, ganacsiga caalamiga ah, shaqaalaha iyo horumarinta dhaqaalaha. Dhawaanahan, waxa uu ku foognaa daraasadaha ku saabsan dhaqaalaha maaliyadda, shaqo la'aanta dhallinyarada iyo cududda bulshada. Waxa uu shahaadada PhD ka qaatay jaamacadda Universiti Putra Malaysia, oo ku taalla dalka Malaysia.

**Xuquuqda daabacaaddan © 2023 | Waxa ay u dhawrsan tahay Machadka Daraasaadka Siyaasadda ee Heritage.**

Akhristayaasha waxa lagu dhiirrigalinayaa in ay sii tarmiyaan xogtan, oo ay iskood u daabacaan, balse sinaba ugama ganacsan karaan. Xaqle ahaan, Machadka Heritage waxa uu si xushmad leh uga codsanaynaa cid kasta oo daabacaddan sii badisaa, in ay mahadnaq iyo nuqul daabacaaddeeda ka mid ah noo hibayso. Adeegsiga khadka tooska ah, waxa aan waydiisanaynaa akhristayaasha in ay ku xirnaadaan macluumaadka shabakadda

**© Heritage Institute 2023.**

# 1. Hordhac

Dagaalkii sokeeye ayaa dhammaan albaabada u laabay nidaamka bangiyada Soomaaliya, waxaana muddo 20 sannadood ah dalka gudihiisa ka maqnaa guud ahaanba bangiyada dowliga ah. Kaalintaas waxa buuxiyay xawaalado ay leeyihiin ganacsato madaxbannaani, kuwaas oo qabanayay adeegyada diridda lacagaha sida xawilaadda iyo fududaynta isusocodka suuqyada ganacsiga dal iyo dibedba.

> *In ay waaxda bangiyadu ku tallaabsato horumarka wax ku ool ah waxa door muhiim ah ka qaatay dardargalinta geeddi-socodka ilaha dhaqaalaha. Tani waxa ay wanaajinaysaa koboca dhaqaalaha, iyada oo kor u qaadaysa dakhliga soo xaroonaya iyo horumarka tignoolajiyada, taas oo lagu kasbanayo in loo maro jidad kala duwan*

In ay waaxda bangiyadu ku tallaabsato horumarka wax ku ool ah waxa door muhiim ah ka qaatay dardargalinta geeddi-socodka ilaha dhaqaalaha. Tani waxa ay wanaajinaysaa koboca dhaqaalaha, iyada oo kor u qaadaysa dakhliga soo xaroonaya iyo horumarka tignoolajiyada, taas oo lagu kasbanayo in loo maro jidad kala duwan. Waxa kuwaas ka mid ah kobcinta xaddiga raasamaalka, isku dubbaridka iyo isku xidhka hantida ka timaadda ilaha kala duwan ee dhaqaalaha iyo bixinta xogaha ku salaysan fursadaha maalgashiga, fududaynta habsami-socodka dhaqaalaha ka yimaadda dibadaha iyo kor u qaadista qoondaynta dakhliga. Waxa la aamminsan yahay in dalalka nidaamka bangiyadoodu horumarsan yihiin ee haysta suuqaq raasamaal oo ku filan, in ay ka kobcoc fiican yihiin kuwa uu liito horumarka nidaamkooda maaliyadeed.[1] Sidaa darteed, markii ay dib u dhalatay nabaddu, waxa ay dowladda Soomaaliya garawsatay muhiimadda ay leedahay horumarinta waaxda maaliyaddu, iyo doorka weyn ee ay kaalintaas ka ciyaari karaan bangiyada ganacsigu, kuwaas oo guud ahaan ba kor u qaadaya horumarka dhaqaalaha dalka iyo maalgashiga.

Sannadkii 2009, ayay dowladda faderaalka Soomaaliya dib u furtay Bangiga Dhexe ee Soomaaliya, oo ahaa tallaabadii ugu horraysay ee loo qaaday dibudhiska hay'adaha maaliyadda. Sannadkii 2012, ayuu Bangiga Dhexe ee Soomaaliya dejiyay Xeerka Hay'adaha Maaliyadda si loo sharciyeeyo hawlaha kormeerka iyo qawaaniinta bangiyada ganacsiga.[2] Sannadkii 2016, ayay dowladda faderaalka Soomaaliya ansixisay sharciga la dagaallanka lacagta sharci darrada ah, kaas oo danbi ka dhigaya dhaqdhaqaaqyada maaliyadeed ee sharci-darrada ah.[3] Illaa iyo maalintaas saddex iyo toban bangi oo ganacsi ayaa la diiwangaliyay, balse waxa ay inta badan bixiyaan adeegyada xawilaadda. Kuwo kooban ayaa bixiya adeegyo kala duwan oo ay ku jiraan daymaha iyo lacagaha moobilada, dayminta iyo maalgalinta waaxda gaarka loo leeyahay.

---

1. World Bank, 2008. Finance, Financial Sector Policies and Long-Run Growth. https://documents1.worldbank.org/curated/en/635691468158710957/pdf/wps4469.pdf
2. Central Bank of Somalia (CBS), 2012. Financial Institution Law. https://centralbank.gov.so/wp-content/uploads/2022/01/Financial-Institution-Law_2102.pdf
3. CBS, 2016. Anti-Money Laundering and Countering the Financing of Terrorism Act. https://centralbank.gov.so/wp-content/uploads/2022/01/Anti-Money-Laundering-and-Countering-the-Financing-of-Terrorism-Act-English-Version1.pdf

> “Bangiyada ganacsiga ee Soomaaliya kuma xidhna nidaamka dhaqaalaha caalamiga ah, inkasta oo ay dhammaan bangiyadu dhawaan qaateen Lanbarrada Akoonnada Bangiyada Caalamiga ah

Si kastaba ha ahaatee, waaxda maaliyadda Soomaaliya waxa ay wali ku shaqaynaysaa xaalado adag, oo ay ka mid yihiin maamul iyo qawaaniin itaal daran, qalalaase siyaasadeed iyo amni darro baahsan, iyo sida oo kale suuq fadhiid ah. Bangiyada ganacsiga ee Soomaaliya kuma xidhna nidaamka dhaqaalaha caalamiga ah, inkasta oo ay dhammaan bangiyadu dhawaan qaateen Lanbarrada Akoonnada Bangiyada Caalamiga ah (International Bank Account Numbers) si ay akoonnada bangiyada ugu sharciyeeyaan qaab electaroonig ah, oo kobcinaya hababka lacag bixinta.[4] Bangiga Dhexe ee Soomaaliya ayaa sheegay in bangiyada Soomaaliya ee qaatay Lanbarrada Akoonnada Bangiyada Caalamiga ah laga filayo in ay sida oo kale soo nooleeyaan kalsoonida bangiyada ay la xidhiidhaan, sharci-dhowrayaasha iyo maalgashatada, kuwaas oo nidaamka dhaqaalaha dalka dib ugu xidhaya suuqa dhaqaalaha caalamka.

Si kastaba ha ahaatee, wali si cad looma fahmin xaaladda nidaamka bangiyada dalka, gaar ahaan kuwa ganacsiga. Ibabixinta heerka uu marayo kobaca dhaqaalaha loo dhan yahay ee Soomaaliya ayaa ah mid u baahan in si weyn loo fahmo caqabadaha hadda jira iyo fursadaha lagu xoojin karo Waaxda bangiyada. Warbixintani waxa ay baadhaysaa xaaladda Waaxda bangiyada Soomaaliya, iyada oo diiradda saaraysa u jidbixinta caqabadaha hortaagan isbeddelka waaxda, soona jeedinaysa talooyin kala duwan oo siyaasadeed, kuwaas oo wax lagaga qabanayo caqabadaha jira.

## 2. Habraaca Daraasadda

Si loo gaadho ujeeddada laga leeyahay daraasaddan, waxa xog ururinta cilmibaadhistan loo adeegsaday waraysi lala yeeshay ilo xog-ogaal ah iyo raadraacyo daraasadeed oo isku dhafan. Labaatan waydiimood, ayaa si foolka-fool-ah iyo si onlayn ah loo waydiiyay daneeyayaal dhaqaale oo tiro badan, kuwaas oo ay ku jiraan saraakiil dowladeed, maamulka sare ee Bangiga Dhexe ee Soomaaliya, daneeyayaal ka kala socda bangiyada ganacsiga iyo Ururka Bangiyada Soomaaliya. Si loo hubiyo in xogtani tahay mid dhammaystiran, waxa uu Machadka Heritage la kaashaday khuburada Waaxda bangiyada. Dhammaan waraysiyadii laga qaaday kaqaybgalayaasha waa la qoray, xogahoodana waa la gorfeeyay, waxaana loo adeegsaday habraacyo ku habboon lafagurkooda. Cilmibaadhuhu waxa kale oo uu dibu-eegis ku sameeyay daraasado ku saabsan arrimaha Waaxda bangiyada si ay u kaalmeeyaan qiimaynta xaaladda hadda ka jirta Waaxda bangiyada iyo sida loo horumarin karo.

4. CBS, 2023. Central Bank of Somalia (CBS) Leads the Country’s Commercial Banks to Adopt International Bank Account Numbers (IBAN). https://centralbank.gov.so/wp-content/uploads/2023/03/Pressrelease-394-IBAN.pdf

# 3. Sooyaalka

## 3.1 Dulmar taariikhi ah

*"Ka dib markii 1950 Soomaaliya la hoos geeyay dowlad barka Talyaaniga (Italian trusteeship) waxa Soomaaliya laga furay shirkad shuraako ahayd oo la odhan jiray Cassa per la Circolazione Monetaria Della, taas oo u shaqaynaysay sidii hay'ad madaxbannaan oo maamusha lacagta ayaa daabacday Lacagta Soomaaliya, waxaanay fududaysay hawlaha sarrifka lacagaha*

Waaxaha dhaqaalaha Soomaaliya waxa ay soo bilaabmeen xilligii gumaysiga (ka hor 1960). Horraantii 1920-aadkii ayaa Muqdisho[5] laga furtay bangi laga leeyahay dalka Talyaaniga loo yaqaanno Banca d'Italia, kaas oo maalgalinayay hawlaha la xidhiidha beeraha sida soo saaridda iyo dhoofinta mooska iyo cudbiga oo ay ka ganacsanjireen ganacsato Talyaani ahi. Waxa taas ku xigay laba bangi oo Talyaani ah, oo la kala odhan jiray Banco di Napoli[6] iyo Banca di Roma, oo Muqdisho laga dhisay 1937 iyo 1958 sida ay u kala horreeyaan. Markii danbe waxa ay bangiyadaasi ku fideen magaalooyinka waaweyn ee dalka sida Marka iyo Kismaayo[7] oo xuddun u ahaa ganacsiga iyo dhaqaalaha. Ka dib markii 1950 Soomaaliya la hoos geeyay dowlad barka Talyaaniga (Italian trusteeship) waxa Soomaaliya laga furay shirkad shuraako ahayd oo la odhan jiray Cassa per la Circolazione Monetaria Della, taas oo u shaqaynaysay sidii hay'ad madaxbannaan oo maamusha lacagta ayaa daabacday Lacagta Soomaaliya, waxaanay fududaysay hawlaha sarrifka lacagaha.[8] Isla xilligaas, waxa Maxmiyaddii Ingiriiska ee Soomaaliland laga hirgaliyay bangi Hindi ah oo la odhan jiray National and Grindlays Bank, markii horena loo yaqaannay National Bank of India, kaas oo Maamulkii Ingiriiska u suuragaliyay bixinta mushaharka shaqaalahiisa.[9] 1960 ayuu bangigani laantiisii ugu horraysay ka furtay Muqdisho ka dib markii ay midoobeen Somaliland iyo Soomaaliya.[10]

Ka dib markii xorriyadda la qaatay 1960 ayaa Bangiga Qaranka Soomaaliya lagu aasaasay Xeer-Digreeto oo tirsigiisu yahay No. 3/1678, iyada oo ay talabixin ku lahaayeen Hay'adda Lacagta Adduunka iyo Bangiga Adduunku. Bangiga waxa loogu talo galay in uu samaynta lacagta Soomaaliya kala soo wareego Cassa per la Circolazione Monetaria Della Somalia, iyo sida oo kale bixinta hawlaha bangiyada ganacsiga.[11] 1968 markii la mideeyay bangiyada lacagta ee Soomaaliya, waxa Bangiga Qaranka Soomaaliya awood loo siiyay in uu maamulo bangiga lacagta iyo hababka daymaha iyo dhaqaalaha dibbada uga yimaadda.[12] Sida oo kale dowladdu waxa ay Bangiga Horumarka Soomaaliya oo ku aasaastay Xeer No.2 oo la ansaxiyay 28 Febraayo 1968.[13] Bangigu waxa uu bixinayay adeegyo maaliyadeed oo loogu talagalay istaraatiijiyadda waaxaha dhaqaalaha sida warshadaha la xiriira beeraha iyo horumarinta kaabayaasha.

---

5. Strangio, D. (2012). Companies and Firms in Italian Somalia. The Reasons for Underdevelopment: The Case of Decolonisation in Somaliland, 75-100.
6. History of Banco di Napoli. Accessed at: https://www.historypage.it/history-of-banco-di-napoli/
7. https://momentunion.wordpress.com/2011/12/18/central-bank-of-somalia/
8. Strangio, D. (2012). Companies and Firms in Italian Somalia. The Reasons for Underdevelopment: The Case of Decolonisation in Somaliland, 75-100.
9. HIPS interview with former deputy governor of the CBS, 2022.
10. Ibid.
11. Naparst, N. (2018). Was the Cassa per la Circolazione Monetaria della Somalia an Orthodox Currency Board? (No. 125). The Johns Hopkins Institute for Applied Economics, Global Health, and the Study of Business Enterprise. https://sites.krieger.jhu.edu/iae/files/2020/01/Was-the-Cassa-per-la-Circolazione-Monetaria-della-Somalia-an-Orthodox-Currency-Board_.pdf
12. Somali National Bank Law in 1968. http://www.somalilandlaw.com/Somali_National_Bank_Law_1968.pdf
13. Ibid.

> Ka dib markii ay dowladdii militeriga ahayd ee Siyaad Barre la wareegtay talada dalka, dowladdu dowladdu waxa ay ku dhaqaaqday isbeddel siyaasadeed oo dhaqaale, waxaana la qarameeyay dhammaan bangiyadii shisheeyaha

Ka dib markii ay dowladdii militeriga ahayd ee Siyaad Barre la wareegtay talada dalka, dowladdu dowladdu waxa ay ku dhaqaaqday isbeddel siyaasadeed oo dhaqaale, waxaana la qarameeyay dhammaan bangiyadii shisheeyaha. 1971, ayaa bangiyada kala ah Banco di Napoli, Banco di Roma, National and Gridlays Bank iyo Banque de Port la isku daray oo laga dhigay Bankiga Ganacsiga Soomaaliyeed.[14] Waxaana loo diiwaangaliyey hay'ad dowladeed, waxaana dhammaan wixii hanti iyo daymo ahaa ee yaallay la wareegtay dowladda.[15] Waxa kale oo ay xukuumaddii cusbayd aasaastay Bangiga Kaydka iyo Daymaha Soomaaliyeed (Somali Saving and Credit Bank) oo si la wareegay hawlihii ganacsi ee uu qaban jiray Bankiga Qaranka Soomaaliyeed. Bangigu waxa uu laamo ku lahaa Kismaayo, Hargaysa, Gaalkacyo, Beledweyne, Boosaaso iyo magaalooyinka kale ee waaweyn. Hawlaha asaasiga ah ee uu qaban jiray Bangiga kaydka iyo Daymuhu waxa ka mid ahaa kaabista ganacsiyada yaryar iyo bixinta daymaha la xidhiidha horumarinta beeraha iyo dhismaha guryaha.

1975 ayay Dowladdii Millateriga ahayd magaca ka beddeshay Bangiga Qaranka Soomaaliya, una bixisay Bankiga Dhexe ee Soomaaliya, kaas oo si gaar ah u maamuli jiray xakamaynta xaddiga iyo jaangooyada siyaasadeed ee ku saabsan xaddiga dulsaarka, mararka qaarna waxa uu daymo wakhtigoodu kooban yahay amaahin jiray warshadaha ganacsiga.[16]

Dowladdii kacaanka ee Siyaad Barre waxa kale oo ay Bangigii Gancsiga iyo Bangigii Kaydka iyo Daymaha u beddeshay Bangiga Daymaha iyo Ganancsiga Soomaaliyeed.[17] Sidaas darteed, waaxda bangiyadu waxa ay ku guuldarraysatay in ay door muhiim ah ka qaadato horumarinta dhaqaalaha Soomaaliya, sida in ay soo jiidato maalgashiga ajaanibta iyo kuwa gudaha ee gaarka loo leeyahay iyo sida oo kale in ay taageero dhaqaale oo ku filan siiso adeegyada ganacsiyada.

Sidii ay u daciifeen hay'adihii kale ee dhaqaalaha dalku ayuu nidaamkii bangiyadu u taagdarreeyay dabayaaqadii 1980-aadkii, iyada oo loo aanaynayo kor u kac degdega oo ku yimi daymaha la siinayo dad ay dowladdii kacaanku si gaar ah u danaynaysay iyo shirkadihii dowliga ahaa oo laga aammin baxay. Arrintaas waxa ka dhashay sixirbarar daran iyo dhaqaalo xumo baahsan.[18]

Wixii ka danbeeyay bilowgii dagaalkii sokeeye ee 1991, waxa guud ahaanba dumay waaxdii bangiyada. Waxa la dhacay hantidii iyo daymihii yaallay bangiyada, waxaana burburay haykalkii jiray. Somaliland ayaa ka dib markii ay ku dhawaaqday in ay ka go'day Soomaaliya dhisatay Bangi Dhexe oo Somaliland u gaar ah sannadkii 1994.

14. International Development Research Centre, 1971. Country Profile Somalia. https://idl-bnc-idrc.dspacedirect.org/bitstream/handle/10625/1445/9725.pdf?sequence=1
15. HIPS interview with the former deputy governor of the Central Bank of Somalia, 29 Oct 2022.
16. HIPS interview with the former deputy governor of the CBS.
17. Ibid.
18. Maimbo, S. M, 2006. Remittances and economic development in Somalia. Social Development Papers, Conflict Prevention and Reconstruction, Paper, 38. https://www.cbd.int/financial/charity/somalia-remittance.pdf

Bangigan ayaa qaatay doorka masuuliyadda siyaasadda lacagta, kormeerka iyo nidaaminta bangiyada gaarka loo leeyahay iyo bixinta hawlo ganacsi oo aad u xaddidan.[19] Si taas la mid ah, waxa ay Puntland samaysatay bangi-goboleed u gaar ah, oo ay shaqadiisa asaasiga ahi tahay qabashada lacagaha dhigaalka ah iyo maamulka lacagaha ka soo xarooda dowladda iyo sida oo kale ruqsad siinta iyo kormeeridda xawaaladaha.[20]

> *Maadaama aanay jirin dowlad shaqaynaysaa, waxa doorkii adeegyada dhaqaalaha buuxiyay bangiyo aan rasmi ahayn oo loo yaqaanno Xawaalado, kuwaas oo bixiya adeegyada xawilaadda lacagaha iyo arrimaha la xidhiidha wax kala iibsiga*

Maadaama aanay jirin dowlad shaqaynaysaa, waxa doorkii adeegyada dhaqaalaha buuxiyay bangiyo aan rasmi ahayn oo loo yaqaanno Xawaalado, kuwaas oo bixiya adeegyada xawilaadda lacagaha iyo arrimaha la xidhiidha wax kala iibsiga. Xawaaladihii ugu horreeyay ee Soomaaliya ka hawlgala waxa ka mid ahaa shirkadaha Al-Barakaat, Dahabshiil, Dalsan, Xawaaladda Amal iyo Towfiiq. Shirkadahani waxa ay sharci la'aan ku shaqeynayeen in ka badan labaatan sano, iyaga oo ku tiirsanaa ammaanada fiican iyo xiriirka wanaagsan ee ay la leeyihiin macaamiishooda.

Xawaaladaha badankooda waxa iska leh saammilay ganacsato ah iyo kooxo isku qoys ah.[21] Nidaamka maaliyadda Soomaaliya ee aan rasmiga ahayn, ayaa si weyn u kobcay soddonkii sano ee la soo dhaafay, isaga oo la kulmay caqabado adag oo ka dhashay deegaanka ay ku shaqeynayaan oo ah mid aan sharci ka jirin iyo sida oo kale in ay la macaamilaan nidaamyada maaliyadda adduunka oo ah mid qallafsan. Taas oo ay ka mid ahayd in aanay u hoggaansamin qawaaniinta ka dhanka ah faldanbiyeedyada lacagta, la'aanta xogaha macaamiisha, qaab-dhismeed maamul oo liita, iyo sida oo kale maqnaanshaha nidaamyo lacag-bixineed midaysan oo qaran.[22]

## 3.2 Xaaladda ay hadda ku sugan tahay waaxda bangiyadu

### 3.2.1 Dibudhiska Bangiga Dhexe ee Soomaaliya

Shuruucda asaasiga ah - Sharciga Hay'adaha Maaliyadda (FIL) ee 2012 – ayaa Bangiga Dhexe ee Soomaaliya u ogolaaday in uu kormeero hay'adaha maaliyadda ee maxalliga ah iyo in uu bixiyo ruqsadaha, isla markaana sharciyeeyo oo uu kormeero hay'adaha ganacsiga ee kaydiya lacagta dadweynaha (gaar ahaan bangiyada ganacsiga iyo xawaaladaha lacagta), iyo sida oo kale in ay ka shaqeeyaan arrimaha maamulka iyo fulinta ganaaxyada ciqaabta.[23]

19. ILO, 2013. Financial Sector Diagnostic Study for Hargeisa, Somaliland. http://slmof.org/wp-content/uploads/2019/02/Diagnostic-Study-for-Somaliland-Financial-Sector.pdf
20. Omer, A. (2004). Feasibility study on financial services in Somalia. UNDP, United Nations Development Programme, Online, 132. https://www.somali-jna.org/downloads/Final%20%20Feasibility%20Study%20%20April-2.pdf
21. Oxfam International, 2013. Keeping the lifeline open: Remittances and markets in Somalia. Accessed at: https://oxfamilibrary.openrepository.com/bitstream/handle/10546/297149/bp-keeping-lifeline-open-somalia-remittances-310713-en.pdf?sequence=1&isAllowed=y
22. Ibid.
23. CBS, 2012. Financial Institutions Law. https://centralbank.gov.so/wp-content/uploads/2022/01/Financial-Institution-Law_2102.pdf

*"Sharciga Ladagaallanka Lacagta sharci-darrada ah iyo Kahortagga Maalgelinta Argagaxisada (AML/CFT) ee 2016 ayaa Bangiga Dhexe ee Soomaaliya u oggolaaday in uu la dagaallamo Lacagta sharci-darrada ah iyo maalgelinta argagixisada*

Sharciga Ladagaallanka Lacagta sharci-darrada ah iyo Kahortagga Maalgelinta Argagaxisada (AML/CFT) ee 2016 ayaa Bangiga Dhexe ee Soomaaliya u oggolaaday in uu la dagaallamo Lacagta sharci-darrada ah iyo maalgelinta argagixisada. Tan waxa looga gollahaa in nidaamka maaliyadda Soomaaliya la waafajiyo nidaamka maaliyadeed ee caalamka[24] maadaama ay hay'adaha maaliyadda looga baahan yahay in ay hirgeliyaan habraacyada maaraynta khatarta iyo xogaha la xidhiidha khataraha ku iman kara macaamiisha, una soo tabiyaan lacagaha shakiga laga qabo isu-dirkooda Xarunta Warbixinta Maaliyadda(FCR). Bangiga Dhexe ee Soomaaliya ayaa sida oo kale aasaasay guddida qiimaynta khataraha qaranka islamarkaana tobabarro siiyay hay'adaha maaliyadda. Dadaalladaasi waxay ay kor u qaadeen xasiloonida maaliyadeed waxaana ay muujiyeen sida ay Soomaaliya uga go'an tahay la dagaallanka danbiyada ka dhanka ah maaliyadda, waxa kale oo ay kor u qaadeen hufnaanta nidaamkeeda maaliyadeed.

Isbeddelada kale ee uu keenay Bangiga Dhexe ee Soomaaliya waxa ka mid ah:

- Sannadkii 2014: waxa la dajiyay shuruucda ruqsadaha bangiyada ganacsiga.[25]
- Sannadkii 2015: waxa la sameeyay sharuucda ku filnaanta raasamaalka iyo maareynta khatarta lacagta kaashka ah
- Sannadkii 2016: waxa la dajiyey shuruucda xisaab-xidhka gudaha (internal audits) iyo xeerar ku saabsan dadka arrimahaas ka shaqeeya. Waxa loo baahnaa in bangiyada ganacsiga loo sameeyo waaxda xisaab-xidhka dibedda (internal audit) iyo in la sameeyo habraacyo iyo qorsheyaal-siyaasadeed oo lagu maamulayo xidhiidhada ku lug leh cidaha ku shaqada leh hawlahaas.
- Sannadkii 2017: waxa la sameeyay sharuuc ku salaysan in ay bangiyada ganacsigu warbixinta xisaabxidhka maaliyadda si sannad le ah ugu soo gudbiyaan Bangiga Dhexe ee Soomaaliya.
- Sannadkii 2018, Bangiga Dhexe ee Soomaaliya soo saaray noocyada hantida iyo qawaaniinta ku salaysan qaybkasta, kaas oo u baahan in ay bangiyada ganacsigu kala saaraan hantidooda oo ay shuruudo u sameeyaan khasaaraha iman kara.[26]

---

24. CBS, 2016. Anti-Money Laundering and Countering the Financing of Terrorism Act. https://centralbank.gov.so/wp-content/uploads/2022/01/Anti-Money-Laundering-and-Countering-the-Financing-of-Terrorism-Act-English-Version1.pdf
25. CBS, 2014. Regulations on Bank Licensing. https://centralbank.gov.so/wp-content/uploads/2022/01/Regulation-on-Bank-Licensing.pdf
26. CBS, 2018. Regulation on Asset Classification and Provisioning. https://centralbank.gov.so/wp-content/uploads/2020/06/Asset-Classification-and-Provisioning-Regulation-CBS_REG_09.pdf

> “Qawaaniinta ku salaysan diiwaangalinta iyo ruqsadaha ee la soo saaray 2014 ayaa u baahan in Bangiga Dhexe ee Soomaaliya ruqsad siiyo xawaaladaha ganacsiga, oo lagu xidho shuruudaha ku habboon, sida in ay haystaan hanti ku filan iyo in ay leeyihiin nidaamka maaraynta khataraha

Bangiga Dhexe ee Soomaaliya ayaa sida oo kale qawaaniin u sameeyay xawaaladaha ganacsiga, iyaga oo waaxda maaliyadda dalka ee itaalka daran u qorsheeyay dabagal iyo kormeer xooggan oo dheeraad ah. Qawaaniinta ku salaysan diiwaangalinta iyo ruqsadaha ee la soo saaray 2014 ayaa u baahan in Bangiga Dhexe ee Soomaaliya ruqsad siiyo xawaaladaha ganacsiga, oo lagu xidho shuruudaha ku habboon, sida in ay haystaan hanti ku filan iyo in ay leeyihiin nidaamka maaraynta khataraha. Qawaaniinta soo baxay 2015 ayaa loogu talagalay in lagaga hortago lacagta sharci-darrada iyo maalgalinta argagixisada ee lagu diro xawaaladaha, iyada oo looga baahan yahay in ay dhaqangaliyaan xidheyaal xooggan sida dabagalka xawilaadaha dhaca iyo soo ururinta xogaha macaamiisha (customer due diligence). [27]

Macaamiisha xawaaladaha ganacsiga iyo qawaaniinta hawlgallada[28] ee soo baxay 2016 ayaa looga dan lahaa in lagu hubiyo in ay xawaaladaha ganacsigu hirgeliyaan habraacyada ku salaysan xakamaynta hawlgalka iyo macluumaadka macaamiisha ee loo yaqaanno (customer due diligence), sida arrimaha amniga, si loo ilaaliyo macluumaadka macaamiisha iyo lacagaha.

Qawaaniinta ku salaysan lacagta moobiillada ee la sameeyay 2020 ayaa muhiim u ahaa nidaaminta waaxda maaliyadda, waxaanay noqotay dariiq si weyn kor ugu qaaday siyaalaha ay Soomaalidu ku heli karaan adeegyo maaliyadeed. Waxa kale oo uu Bangiga Dhexe ee Soomaaliya hirgaliyay dibuhabayn lagu sameeyay hay’adaha maaliyadda si loo xoojiyo shaqaalahooda iyo waaxaha lafdhabarta u ah. Bangigu waxa ay goobaha muhiimka ah u shaqaalaysiiyeen khuburo ku xeeldheer arrimaha dhaqaalaha sida lacagta iyo hawlaha bangiyada iyo dhaqaalaha, maaliyadda iyo shuruucda siyaasadda, iyo sida oo kale maamulka maaliyadda iyo taageerada adeegyada. Bangiga Dhexe ee Soomaaliya ayaa shaqaalihiisa siisay barnaamijyo kartidooda lagu dhisayo dal iyo dibadba, si wax looga baro hababka ugu wanaagsan lagu shaqeeyo. Dhanka shaqada, Bangiga Dhexe ee Soomaaliya waxa uu ku kooban yahay oo kaliya magaalada Muqdisho. Si kastaba ha ahaatee, waxaa jira qorshayaal lagu doonayo in uu bangigu laamo ka furto caasimadaha dowlad-goboleedyada dalka, sida uu sheegay sarkaal sare oo ka tirsan Bangiga Dhexe ee Soomaaliya.[29]

Bangiga Dhexe ee Soomaaliya wali dib uma soo celin doorkiisii siyaasadda lacagta tan iyo burburkii dowladda 1991. Lacagta dalka ee rasmiga ah ayaa ah shilinka Soomaaliga. Si kastaba ha ahaatee, lacagaha ugu badan ee bulshada dhex wareegtaa ayaa ah lacagta moobillada lagu shubto, taas oo keentay in dhaqaalaha dalku noqdo mid aad ugu tiirsan doollarka Maraykanka.

---

27. CBS, 2015. Regulations for Money Transfer Businesses on Anti-Money Laundering. https://centralbank.gov.so/wp-content/uploads/2018/07/AML-for-MTB-Regulation.pdf
28. CBS, 2016. Regulations for Money Transfer Businesses on Customer Registration. https://centralbank.gov.so/wp-content/uploads/2020/02/Customer-Identification-Regulation.pdf
29. HIPS interview, 2023.

Suuqyada dhaqaalaha ee rasmiga ah iyo kuwa aan rasmiga ahayniba waxa ay si maalinle ah wax ugu kala gataan lacagta doollarka.[30] Xasilooni darrada iyo isbedbeddelka ku yimaadda isku sarrifka shiling Soomaaliga iyo doollarka ayaa ah caqabada ugu weyn ee soo foodsaartay waaxda maaliyadda dalka. Mid ka mid ah ka qaybgalayaashii daraasaddan ayaa sheegay in ay sarrifyalaasha suuqa Bakaaruhu jaangooyaan xaddiga sarrifka lacagaha.[31]

Sarkaal sare oo lagu wareystay warbixintan ayaa sheegay in dowladda Federaalka Soomaaliya mudnaanta koowaad siinayso in ay samayso lacag cusub, balse ay taas hortaagan yihiin caqabado dhaqaale iyo kuwo siyaasadeed. Caqabadda ugu weyn ee jirta ayaa ah farqiga baaxadda leh ee u dhaxeeya miisaaniyadda la hayo iyo dhaqaalaha looga baahan yahay in lagu sameeyo lacagta cusub, maadaama ay miisaaniyad sannadeedka Soomaaliya si weyn ugu tiirsan yahay deeqbixiyayaasha caalamka, taas oo markii hore loo qoondeeyay amniga iyo waaxaha maamulka dalka.[32] Sida oo kale, waa in ay DFS iyo Dowladaha xubnaha ka ah Dowladda Federalku is-afgarad ka gaaraan Siyaasadda Lacagta dalka, gaar ahaan samaynta lacagta cusub. Iyada oo ay DFS masuul ka tahay dajinta siyaasadda lacagta, haddana waa in ay kala tashataa dowlad-goboleedyada si loogu heshiiyo lacagta cusub ee la sameynayo. Waxa kale oo iyaduna caqabad weyn ah arrinta amniga, maadaama ay kooxda xagjirka ah ee al-Shabaab ka taliso qaybo ka mid ah dalka, iyada oo ay muhiim tahay in lacagta cusub la wada gaadhsiiyo dhammaan gobollada dalka. Sidaa darteed, waa lama huraan in uu Bangiga Dhexe ee Soomaaliya mudnaan siiyo in uu dhaqaale u qoondeeyo samaynta lacagta cusub, isla markaana uu dejiso siyaasado iyo istaraatiijiyado lagu maaraynayo siyaasadda lacagta. Lacag xasiloon oo la isku hallayn karaa kuma filla oo kaliya horumarinta waaxda maaliyadda laakiin sida oo kale waxa ay kor u qaadaysaa dibudhiska dhaqaalaha Soomaaliya.

> *"Caqabadda ugu weyn ee jirta ayaa ah farqiga baaxadda leh ee u dhaxeeya miisaaniyadda la hayo iyo dhaqaalaha looga baahan yahay in lagu sameeyo lacagta cusub*

### 3.2.2 Nidaamka lacag-bixinta Qaranka

Sannadkii 2021, ayay Soomaaliya bilawday nidaamkii ugu horreeyay ee lacag-bixinta qaranka, si loo suuragaliyo xidhiidhka isku dirida lacageed ee u dhexeeya 13-ka bangi ee ganacsiga.[33] Tani waxa ay ahayd tallaabo taariikhi ah oo loogu talagalay in lagu horumariyo waaxda maaliyadeed oo wax ku ool ah. Kaabayaasha tignoolajiyadda isgaadhsiinta ayaa la meelmariyey, kuwaas oo ay ku jiraan qalabka kombayutarro ah, softiweerro muhiimka u ah qalabka lagu shaqaynayo, softiweerro loo sameeyay in lacagta lagu bixiyo iyo shaqaale xirfad leh oo u qalma in ay maamulaan nidaamkan.[34] Bangiga Dhexe ee Soomaaliya ayaa ku guulaystay in uu hirgaliyo tallaabadan aasaasiga ah si uu isku dirka tooska ah ee lacaguhu u noqdo mid u dhaxeeya oo ay ku wada hawlgali karaan hay'adaha maaliyaddu.

30. World Bank, 2022. Collection of Policy Notes for the New Government: Unlocking Somalia's Potential to Stablize, Grow and Prosper. https://openknowledge.worldbank.org/server/api/core/bitstreams/4b07892d-d8a4-5a8e-9f35-bf67dd57d02f/content
31. HIPS interview, 2023.
32. HIPS interview with a senior official at the CBS, 2023.
33. CBS, 2021. Somalia Launches first National Payment System. https://centralbank.gov.so/national-payment-system/
34. HIPS interview with the executive director of currency and banking operations at the CBS.

Mar labaadka, waxa uu Nidaamka Lacag-bixinta Qaranku fuliyay mashruuca Nidaamka Warbixinta Dhaqdhaqaaqyada Iibka Soomaaliya. Habkani waxa uu ka kooban yahay muddada dhabta ah ee la isugu diro lacagaha electerooniga ah, kuwaas oo suuragaliya in 60 daqiiqo gudahood lagu bixiyo lacago tiro badan, oo ku lug leh dhaqdhaqaaqyada suuqa lacagta, iyo deegaannada amnigooda iyo dhaqdhaqaaqyada ganacsigoodu yihiin kuwo wakhti kooban ku habboon, iyo sida oo kale nidaamka electarooniga ah ee fududeeya diritaanka-maaliyadeed ee la xidhiidha bixinta lacagaha yaryar, kuwaas oo ay ku lammaan tahay waajibaadka u dhexeeya bangiyada ganacsiga, ee ku sargo'an dhammaadka maalinta, si ay u bixiyaan adeegyada ay ka midka yihiin hannaanka mushaar bixintu.

Saddex bilood ka dib hirgalintii Nidaamka Lacag-bixinta Qaranka, tirada dhaqdhaqaaqyada lacagta la isu diray waxa ay gaadhay 222,697, taas oo qiimaheedu gaaray $214.1 milyan.[35] Tan iyo markii la furay Nidaamka Lacag-bixinta Qaranka, waxa ay tirada guud ee dhaqdhaqaaqyada lacagta ay bangiyadu isu direen kor u dhaaftay 1 bilyan.[36]

Hawlaha dhaqaaluhu waxa ay ku tiirsan yihiin maamulka lacagta, kharashaadka wax kala-iibsiga iyo abuuritaanka badeecooyin maaliyadeed oo cusub—dhammaantood waxa ay noqon karaan ilo dakhli oo muhiim u ah hay'adaha maaliyadeed—waxaana laga yaabaa in looga faa'iidaysto taaba gelinta nidaamka lacag-bixinta dalka. Nidaamka Lacag-bixinta Qaranka ayaa sida oo kale suuragaliyay in ay Soomaaliya hal tallaabo u qaaddo dhanka ku xidhnaanta hay,adaha maaliyadeed ee caalamiga ah.

> *Caqabadda ugu weyn ee hortaagan in si buuxda loo hirgeliyo u guuritaanka Nidaamka Lacag-bixinta Qaranka waxa ka mid ah, qaar ka mid ah saamilayda waaxda maaliyadda, oo diiddan ay dhamaystiraan xeer hoosaadka looga baahan yahay u hoggaansanaanta nidaamkan*

Si kastaba ha ahaatee, Nidaamka Lacag-bixinta Qaranka ayaan wali ka shaqaysiinin Shabakadda Isku-xidhka Lacag-bixinta Soomaaliya (Somali Payment Switch) taas oo ah shabakad isku xidhi karta dhammaan iibabka Soomaaliya nidaamka kasta oo iib ah, adeegga ATM-ka, habka lacag bixinta mobillada, iyo goobaha ganacsiga ee ku salaysan shabakadaha interneedka. Sidaa darteed, waxa ay isku xidhi kartaa dhammaan iibabka elegtarnooniga ku salaysan, waxaanay si maangal ah ugu hagi kartaa hal iyo wixii ka badan oo ah nidaamyo lacag-bixineed oo xasilloon, rasmina ah.

Caqabadda ugu weyn ee hortaagan in si buuxda loo hirgeliyo u guuritaanka Nidaamka Lacag-bixinta Qaranka waxa ka mid ah, qaar ka mid ah saamilayda waaxda maaliyadda, oo diiddan ay dhamaystiraan xeer hoosaadka looga baahan yahay u hoggaansanaanta nidaamkan, kaas oo ay ku jiraan in ay agaasimeyaasha fulinta hay'adaha maaliyaddu ansixiyaan xeerarkan iyo maqnaanta shaqaale xirfad u leh Tignoolajiyada iyo Isgaarsiinta (ICT) iyo farsamayaqaanno abuura awoodda farsamo ee looga baahan yahay in nidaamkan lagu xirmo.[37]

35. CBS, 2021. Quarterly Economic Review (2021Q4). https://centralbank.gov.so/wp-content/uploads/2022/08/Quarterly-Economic-Report-2021-Q4.pdf
36. HIPS interview with the executive director of currency and banking operations at the CBS, January 2023.
37. HIPS interview with a financial sector expert.

### 3.2.3 Bangiyada Ganacsiga

Wixii ka danbeeyay dibu-dhiska Bangiga Dhexe ee Soomaaliya, DFS waxa ay si tartiibtartiib ah u bilowday nidaaminta iyo kormeeridda hay'adaha kala duwan ee maaliyadda, kuwaas oo ay ka mid yihiin bangiyada ganacsiga, xawaaladaha iyo hawl-wadeennada lacagaha moobillada.

Bangiga Dhexe ee Soomaaliya ayaa sheegay in sannadkii 2018 ay Soomaaliya ka howlgalayeen 7 bangi oo ganacsi iyo 12 xawaaladood oo ka ganacsada lacagaha moobillada la isugu diro. Todobada bangi ee ruqsadda ganacsiga haystay waxa ka mid ah: Bangiga Caalamiga ah ee Dahabshiil, Bangiga Amal, Bangiga Caalamiga ah ee Soomaaliya, Bangiga Soomaaliya ee Salam iyo Bangiga Trust African. Bangiyadan ayaa caadiyadan bixiya adeegyada bangiyada Islaamiga ah, midkoodna ma bixiyo adeegyada bangiyada caadiga ah.

Dabayaaqadii bishii Maarso 2020, waxa ay lacagaha ay macaamiishu bangiyada dhigtaan u badnaayeen noocyada akoonnada hadda jira, kuwaas oo kala ah akoonnada maalgalinta Qardul-xasana iyo Muraabaxada, kuwaas oo ilaha maalgalinta jira ka noqonaya boqolkiiba 80. Caadiyan, hantida macaamiishu waa maalgelinta muddada gaaban, waxaana ku xigta lacagta caddaanka ah ee gacanta ku jirta iyo maalgelinta hantida iyo ganacsiyada wadajirka ah. Halka ay qandaraasyada Muraabaxada, oo ay ka mid yihiin Muraabaxada badeecadu ka yihiin kuwa ugu badan ee loo isticmaalo maalgelinta wax kala iibsiga. Qandaraasyada kale ee ay ka midka yihiin Istisnaa, Mudaarabah iyo Mushaarakah ayaa ah kuwa ay ugu isticmaalka yar yihiin bangiyadu.

## Shaxanka 1-aad: Bangiyada Ganacsiga ee Soomaaliya

| Magaca Bangiga | Sannadka la aasaasay |
|---|---|
| Bangiga Beeraha (Agro Bank) | 2019 |
| Bangiga Amal | 1998 |
| Bangiga Amaana | 2019 |
| Bangiga Bulsho | 2020 |
| Bangiga Caalamiga ah ee Dahabshiil | 2014 |
| Bangiga Daryeel | 2006 |
| Bangiga Caalamiga ah ee Galaxy | -- |
| Bangiga Bulshada ee Idman | 2020 |
| Bangiga Caalamiga ah ee Soomaaliya (IBS) I | 2014 |
| Bangiga MyBank | 2018 |
| Bangiga Premier | 2013 |
| Bangiga Soomaaliya ee Salam | 2009 |
| BangigaSoomaaliya(Sombank) | 2019 |

*Sannadkii 2021, ayay tirada bangiyada ganacsiga Soomaaliya gaadheen 13, maadaama oo uu Bangiga Dhexe ee Soomaaliya ruqsad bangi siiyay qaar ka mid ah xawaaladaha ganacsiga*

Sannadkii 2021, ayay tirada bangiyada ganacsiga Soomaaliya gaadheen 13, maadaama oo uu Bangiga Dhexe ee Soomaaliya ruqsad bangi siiyay qaar ka mid ah xawaaladaha ganacsiga. Bangiyadaas waxa ka mid ahaa: Bangiga Soomaaliya ee Salam, Bangiga Caalamiga ah ee Dahabshiil, Bangiga IBS, Bangiga Premier, Bangiga Caalamiga ah ee Galaxy, Bangiga MyBank, Bangiga Soomaaliya(Sombank), Bangiga Daryeel, Bangiga Amaana, Bangiga Amal, Bangiga Beeraha(Agro Bank), Bangiga BB iyo Bangiga Bulshada ee Idman. Bangiyadan badankoodu waxa ay laamo ku leeyihiin magaalooyinka waaweyn ee dalka, halka ay qaarkood laamo ku leeyihiin dalalka jaarka.

*Marka loo eego rubuc-sannadeedkii saddexaad ee warbixin-maaliyadeedda sannadkii 2022, wadarta guud ee hantida bangiyada ganacsiga Soomaaliya waxa uu gaaray $1.4 bilyan*

Inkasta oo ay bangiyada ganacsiga ee Soomaaliya caadi ahaan bixiyaan adeegyada bangiyada Islaamiga ah, haddana wali dalku ma ansixin sharci maaliyadeed oo Islaami ah, kaas oo ay tahay in lagu hago waaxda maaliyadda. Dhaqangelinta shuruuc maaliyadeed oo Islaami ah, islamarkaana dhammaystiran, ayaa keenaysa xayndaab sharci oo cad, taasina waxa ay xaqiijinaysaa nidaam maamul oo sugan iyo in lala socdo hab-dhaqanka bangiyada Islaamiga ah ee Soomaaliya. Waaxda bangiyada ayaa ku tallaabsatay horumar joogto ah, inkasta oo ay soo foodsaareen xaalado qallafsani. Jaantuska 1-aad, ayaa muujinaya in wadarta guud ee hantida bangiyada ganacsigu gaareen $1.2 bilyan sannadkii 2021, halka ay ka ahaayeen $414 milyan sannadkii 2018. Wadarta hantida bangiyada ayaa sii korodhay 2022, ka dib markii la diiwaangaliyay bangiyada cusub, ee uu Bangiga Dhexe ee Soomaaliya siiyay ruqsadda banginimada. Marka loo eego rubuc-sannadeedkii saddexaad ee warbixin-maaliyadeedda sannadkii 2022, wadarta guud ee hantida bangiyada ganacsiga Soomaaliya waxa uu gaaray $1.4 bilyan. Lacagta caddaanka ah ee gacanta ku jirta ayaa noqotay hantida ugu badan (kala bar wadarta guud), waxaana ku xigtay hantida maalgelinta oo noqotay ($253.8 milyan) iyo hantida maalgashiga oo iyana gaartay ($222.1 milyan). Hantida kale oo dhan waxa lagu qiyaasay $74.2 milyan, sannadkii 2022.

**Jaantuska 1-aad: Waxa uu muujinayaa wadarta guud ee raasamaalka iyo daymaha bangiyada ganacsiga Soomaaliya (milyanaad)**




## Tixraac: Bangiga Dhexe ee Soomaaliya

Wadarta guud ee kharashaadka bangiyada ganacsiga ayaa sannadkii 2018 gaaray $1.2 bilyan, halka uu rubucii saddexaad ee 2022 ka ahaa $361 milyan (eeg jaantuska 1-aad). Kaydka macaamiisha (dalabaadka dhigaallada bangiyada ganacsiga iyo dhigaallada qofeed) ayaa ah wadarta deymaha ee ugu badan, taas oo gaadhay ($1 bilyan), waxaana ku xigay deymaha kale oo ahaa ($75 milyan).[38] Daymaha ku saabsan maalgelinta yar-yar ayaa ah qaybta ugu yar oo wadar ahaan dhan ($1.7 milyan, marka laga soo bilaabo Maarso 2022).

*"Waxa jira khataro waaweyn oo la xidhiidha in ay bangiyada ganacsiga soo gaadhaan hantida ma-guurtada ahi, kuwaas oo sii kordhaysay sannadihii u dambeeyay*

Waxa jira khataro waaweyn oo la xidhiidha in ay bangiyada ganacsiga soo gaadhaan hantida ma-guurtada ahi, kuwaas oo sii kordhaysay sannadihii u dambeeyay. Tani waxa ay sababtay in ay waaxda hantida ma-guurtada ahi karkarayso, waxaana jira calaamado muujinaya xumbada karka. Intaa waxaa dheer, shirkadaha bangiyadu waxa ay leeyihiin qaybo waaweyn oo isku xidhan (bangiyadu waxa ay si xad dhaaf ah wax u amaahiyaan hay'adaha iyaga ku xidhan). "Waxa jirta khatar weyn oo arrintan ku gedaaman" ayuu yiri sarkaal sare oo ka tirsan Bangiga Dhexe ee Soomaaliya.[39]

38. Central Bank of Somalia (CBS) Quarterly Economic Review (2022Q2). https://centralbank.gov.so/wp-content/uploads/2023/02/Quarterly-Economic-Report_Q2_2022_12Feb23.pdf
39. HIPS interview 2023.

Saraakiisha Bangiga Dhexe ee Soomaaliya iyo kuwa bangiyada ganacsiga ee lagu waraystay daraasaddan ayaa ku soo celcelinayay in bangiyada ganacsigu haystaan hanti ku filan, Inkasta oo ay xaqiiqadu tahay in waxqabadkoodu aad u kala duwan yahay, sida oo kalana ay xaddidan tahay tayada hantidoodu marka la barbar dhigo bangiyada gobolka ee filkooda ah. Tusaale ahaan, waaxda bangiyada Liberiya, waxa uu saamiga ku filnaanta raasamaalkeedu gaaray boqolkiiba 31.8 sannadkii 2021,[40] halka uu Soomaaliya ka ahaa 13.3 boqolkiiba.[41] In kasta oo la fahmi karo in dhaqaale darradu caqabad ku tahay waxqabadka waaxda bangiyada, ku foognaanta khataraga, tayada daymaha iyo caqabadaha lacagaha caddaanka ah ee sii kordhaya ayaa la sheegay in ay yihiin caqabadaha curyaamiyey hufnaanta iyo tayada waaxda. Khataraha la xidhiidha hawlgallada sida isticmaalka nidaamyada waaxda isla xisaabtanku ka yimaaddo shaqaalaha gudaha (in-house systems) ayaa weli dhib ku ah bangiyada Soomaaliya. Waxa kale oo jira in aanay bangiyadu awood ku filan u lahayn xakamaynta dhaliilaha ka jira gudahooda sida khayaanada, tuugannimada, adeeg la'aanta nidaamka interneetka, tagidda khadka iyo amniga jebinta interneetka.[42]

Taas lidkeeda, xasilloonida tayada hantida waaxda bangiyada Soomaaliya, sida ka muuqata saammiga deymaha aan la gudin (non-performing loans), ayaa sannadihii la soo dhaafay ahaa mid cajiib ah. Intii u dhaxaysay 2019 iyo 2022, waaxda bangiyadu waxa ay saammiga deymaha aan la gudin ku xakamaysay in uu ka hooseeyo 3%, taas oo loo aanayn karo horumarinta waxqabadka bangiyada dalka iyo sida oo kale tallaabooyinka u hoggaansanaanta qawaaniinta Bangiga Dhexe ee Soomaaliya. Si kastaba ha ahaatee, sannadkii 2020, wadarta xaddiga saammiga deymaha aan la gudin ayaa kor u kacay ilaa $9.6 milyan, taas oo ka tarjumaysa saamaynta taban ee COVID-19-ku ku yeeshay waaxda maaliyadda.[43] Si kastaba ha ahaatee,xaddiga saammiga deymaha aan la gudin ayaa hoos u dhacay ilaa $6.1 milyan sannadkii 2021, iyada oo dhaqaaluhu dib u soo kabtay.

> “
> *maxsuulka hantida maalgelinta waaxda bangiyada ayaa kor uga soo kacday qiyaastii $156 milyan sannadkii 2019 iyada oo gaadhay 292 milyan sannadkii 2022, marka loo eego xogta Bangiga Dhexe ee Soomaaliya*

In kasta oo ay wiiqeen caqabadaha ay ka midka yihiin masiibada COVID-19 iyo khataraha kale ee la xidhiidha isbeddelka cimilada, maxsuulka hantida maalgelinta waaxda bangiyada ayaa kor uga soo kacday qiyaastii $156 milyan sannadkii 2019 iyada oo gaadhay 292 milyan sannadkii 2022, marka loo eego xogta Bangiga Dhexe ee Soomaaliya. Khatarta ku gadaaman waaxda ee ku aaddan lacagta caddaanka ah ayaa hoos u dhacday sannadahan, iyada oo saamiga hantida caddaanka ahi kor uga soo kacday 35% sannadkii 2019, iyada oo gaartay 52% sannadkii 2022.[44] Korodhkaasi waxa uu xaqiijisay in bangiyada ganacsiga dalku ay helaan dakhli ku filan si ay u gutaan waajibaadkooda maaliyadeed.

---

40. World Bank Report, 2022. Liberia Economic Update: Investing in Human Capital for Inclusive and Sustainable Growth. Accessed at https://documents.worldbank.org/en/publication/documents-reports/documentdetail/099455109192219278/p177994009187f0f60ba8d0fe0eeb8b19ec
41. World Bank report, 2022. Somalia Economic Update: Investing in Social Protection to Boost Resilience for Economic Growth. https://openknowledge.worldbank.org/bitstream/handle/10986/38206/P17502402429f50e708a6408e3872dbb193.pdf?sequence=1&isAllowed=y
42. HIPS interview, 2023.
43. CBS data on commercial banks of Somalia, 2023.
44. Ibid.

Xaaladda daymaha u diyaarsan ganacsiyada iyo shaqsiyaadka Soomaaliya ayaa ah arrin caadiyan haysata dhaqaale kasta oo ay dagaallo ragaadiyeen, halkaas oo aanay ka jirin kaabayaal maaliyadeed oo suuragalinaya horumarinta agabka amah maalgelineed oo wax ku ool ah.

Cilmibaadhis ay sameeyeeyn Ernst & Young sannadkii 2018 ayaa muujinaya in farqiga u dhaxeeya dalabaadka amaahaha ay doonayaan ganacsatada iyo shaqsiyaadku iyo haynta (sahayda) ay tahay $2 bilyan.[45] Jidka ugu weyn ee ay shakhsiyaadka iyo ganacsiyadu dhaqaale ku kasban karaan wali waa ilo aan rasmi ahayn sida qoyska, asxaabta iyo dadka ay yaqaaniin ganacsiga. Sida warbixinta lagu sheegay, saddex-meelood laba meelood ganacsiyadu waxa ay ku tiirsan yihiin qoysas, asxaab iyo xidhiidho ganacsi, oo ay ku daboolaan baahiyaha dhaqaale. Ganacsiyadu waxa ay isticmaalaan ilahan aan rasmiga ahayn, sababta oo ah shuruudaha ay bixiyaan hay'adaha maaliyadeed ayaan ku habboonayn xaaladaha jira, sababta oo ah ma laha wax dammaanad ah.[46]

Sannadkii 2022, ayuu Bangiga Adduunka soo saaray warbixin cusub, oo ku saabsan dhaqaalaha Soomaaliya, taas oo muujinaysa in amaahda ganacsiga gaarka loo leeyahay hoos u dhacday 2021. Sida lagu sheegay warbixintan, amaahda bangiyada ganacsiga ku aaddan waaxda gaarka loo leeyahay oo ah saammiga wadarta hantida guud ayaa hoos u dhacday boqolkiiba 25.5 sannadkii 2021, isaga oo boqolkiiba 26 kannadkii soo kacay 2020.[47] Marka arrintan loo eego, ganacsigu waa maalgelinta hantida aasaasiga ah waxaana lagu qiyaasaa boqolkiiba 32, waxaana ku xiga deynta dhismaha iyo deynta guryaha. Soomaaliya waxa ay ku jirtaa meesha ugu hoosaysa caalamka, marka loo eego tusaha helista amaahda, iyada oo boqolkiiba 4.2 ka ah Waxsoosaarka Gudaha Dalka (GDP) ah.[48]

*"Soomaaliya waxa ay ku jirtaa meesha ugu hoosaysa caalamka, marka loo eego tusaha helista amaahda, iyada oo boqolkiiba 4.2 ka ah Waxsoosaarka Gudaha Dalka (GDP) ah*

Soomaaliya waxaa ka jira lix hay'adood oo waaweyn oo maal-gashi yaryar bixiya, kuwaas oo intooda badani ku xiran tahay bangiyada ganacsiga. Intaa waxaa dheer, Ururrada aan Dowliga ahayn iyo kuwa caalamiga ah ayaa bixiya badeecooyin maaliyadeed oo yar yar, kuwaas oo si weyn loo kaba ganacsiyada yar yar.

Si kastaba ha ahaatee, maalgelinta yar yar ayaa weli aad u liidata, Bangiga Dhexe ee Soomaaliyana wali muu samaynin qaab-dhismeed sharci oo ku salaysan maalgalinta yar yar, si uu waaxda gaarka loo leeyahay uga caawiyo fududaynta helitaanka amaahda, gaar ahaan ganacsiyada yaryar. Xeerarkan ayaa lagu tilmaamay in ay yihiin kuwo muhiim u ah hagaajinta helitaanka daymaha waaxda gaarka loo leeyahay iyo sida oo kale fududaynta deymaha si ganacsiyada yaryar looga caawiyo dadaalka ay ugu jiraan horumarka. Masuul ka tirsan Bangiga Dhexe ee Soomaaliya ayaa sheegay in ay socdaan shuruucda ku saabsan dhismaha xafiiska deymaha iyo biilasha maalgalinta yar yar, oo dhawaan baarlamaanka loo gudbin doono.

---

45. Ernst & Young, 2018. Expanding the Circles of Trust: Unleashing the Power of Financial Intermediation and Global Connectedness for Somalia.
46. Ibid.
47. World Bank report, 2022. Somalia Economic Update: Investing in Social Protection to Boost Resilience for Economic Growth. https://openknowledge.worldbank.org/bitstream/handle/10986/38206/P17502402429f50e708a6408e3872dbb193.pdf?sequence=1&isAllowed=y
48. IMF, 2022. 2022 Article IV Consultation and Fourth Review under the Extended Credit Facility-Press Release; and Staff Report. https://www.imf.org/en/Publications/CR/Issues/2022/12/16/Somalia-2022-Article-IV-Consultation-and-Fourth-Review-under-the-Extended-Credit-Facility-527022

Sida oo kale, helitaanka daymaha ayaa ah hawl adag, sababta oo ah dhaqaalaha Soomaaliya waa mid aan rasmi ahayn. Marka loo eego warbixintii Bangiga Adduunka ee 2021, saddex-meelood laba meelood, shirkadaha ku yaalla magaalooyinka waaweyn sida Muqdisho iyo Boosaaso waa ganacsiyo aan rasmi ahayn. Inta badan ganacsiyada, gaar ahaan shirkadaha yar yar iyo kuwa dhexdhexaadka ah, ayaa caadiyan ku shaqeeya lacag caddaan ah, taas oo amaahda bangiyada ka dhigaysa mid adag. Maareeye bangi ayaa sheegay in "itaaldarrada nidaamka sharciga iyo garsoorka iyo daciifnimada fulinta qandaraasyada, iyo sida oo kale la'aanta macluumaadka deynta ayaa caqabad ku ah helitaanka deynta ganacsiyada yaryar, waxaanay caqabad ku tahay ka soo kabashada deynta". Waxa kale oo uu caqabad ku sheegay maxkamadaha oo ah kuwo fadhiid ah, islamarkaana wiiqay fidinta iyo in daymaha noocyadooda kala duwan, maadaama oo aan lagu kalsoonaan karin in ay maxakamaddu ilaaliso heshiisyada iyo in ay ururiso deymaha.[49]

### 3.2.4 Lacagta Moobillada

> "Dadweyne ka badan boqolkiiba 80 ayaa isticmaala lacagaha moobillada, marka la barbar dhigo boqolkiiba 8.8 akoonno ku leh bangiyada

Lacagaha moobilada ayaa ah il dhaqaale oo muhiim ah, kuwaas oo ay shirkadaha maaliyaddu ka helaan dadka aan bangiyada lahayn, taas oo Soomaaliya ka dhigaysa mid ka mid ah suuqyada ugu dhaqdhaqaaqa badan lacagaha moobillada marka loo eego adduunka. Dadweyne ka badan boqolkiiba 80 ayaa isticmaala lacagaha moobillada, marka la barbar dhigo boqolkiiba 8.8 akoonno ku leh bangiyada, marka loo eego warbixin dhowaan ka soo baxday Sahanka Miisaaniyadda Isku-dhafan ee Qoyska (Integrated Household Budget Survey).[50] Adeegyada la isticmaalo waxaa ka mid ah lacagta dhigaalka ah (eMoney) oo ah qaab lacagta loogu kaydsado moobillada,loogalana baxo lacag caddaan ah, wax kala iibsashada iyo bixinta mushaharka.

Isaga oo taageero ka helaya laanta Bangiga Adduunka u qaabilsan Horumarinta Awoodda Soomaaliya, Hay'adaha ku hawllan Asaasiyaadka nolosha iyo Hal-abuurka Ganacsiga,iyada oo loo marayo Mashruuca Kor-uqaadista Dhijitaalka, waxa uu Bangiga Dhexe ee Soomaaliya abuuray shuruuc ku saabsan lacagta moobillada sannadkii 2020[51] kaas oo dhigaya in hawlwadeennada shabakadaha moobilladu, ruqsad ka helaan Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka. (NCA). Lacagta moobilka waxa lagu qeexaa qiime lacageed oo lagu kaydiyo qalab kasta oo elegtaroonig ah, ee ma aha kaliya talefanka gacanta.[52] Afartan shirkadood ayaa ruqsad la siiyay: Hormuud Telecom, SOMTEL SOMALIA LTD, SOMLINK Telecom, iyo GOLIS Telecom.[53] Sarkaal lagu waraystay daraasaddan ayaa sheegay in ay shirkadaha kale wali ku hawlgalaan bilaa ruqsad.

---

49. HIPS interview with a bank manager.
50. SNBS, 2023. Somalia Integrated Household Budget Survey. https://api.nbs.gov.so/wwwroot/Publications/188d169e4c294911a1e0c58ab00fd390.pdf
51. CBS, 2020. Mobile Money Regulations. https://centralbank.gov.so/wp-content/uploads/2021/03/Mobile-Money-Regulation-2020_amended.pdf
52. Ibid.
53. CBS, supervision and licensing. https://centralbank.gov.so/licensing-supervision-department/

Inkasta oo ay lacagta moobilku abuurtay fursado, haddana waxa ay leedahay khataro badan. Tusaale ahaan. Tusaale ahaan, ma jiraan shuruudo cad oo ah " Garo Macmiilkaaga" kuwaas oo ku saabsan aqoonsiga macmiilka marka loo eego nidaamka hadda la isticmaalo, sida oo kale ma jiraan wax mideeya oo ka dhexeeya lacagta dhijitaalka ah (eMoney) iyo lacagta caddaanka ah ee bangiyada. Dhawr ka mid ah ka qaybgalayaasha ayaa ku andacoonaya in ay sabab u tahay wada shaqayn la'aanta ka dhaxaysa adeegyada kala duwan iyo dayacnaanta ku salaysan maaliyadda, in lacagta moobilku tahay mid aan la isku halleyn karin oo lacagtooda khatar gelinaysa.

### 3.2.5 Xawaaladaha Lacagta

Xawaaladaha Lacagta ayaa door muhiim ah ku leh waaxda maaliyadda aan rasmiga ahayn ee Soomaaliya. Xawaaladahu waxa ay fududeeyaan xawilaadda lacagaha gudaha iyo kuwa dibedda, wax kala iibsiga ganacsiga, iyo sida oo kale xawilaadda lacagaha bini'aadantinimada. Dalka waxa ka hawlgala 12 xawaaladood ruqsad leh.[54] Kuwa ugu wanaagsani waa: Xawaaladda Amal Express, Xawaaladda Dahabshiil, Xawaaladda TAAJ, Iftin Express LTD iyo Xawaaladda Tawakal. Badankoodu waxa ay ka shaqeeyaan adduunka oo dhan, iyaga oo isticmaalaya wakiillo u fadhiya xafiisyo ku baahsan dunida dacalladeeda iyo hay'adaha saddexaad maaliyadeed, kuwaas oo lacagta u qaada Dubai - kaas oo u adeega u kala qaada diraha iyo loo diraha.

In kasta oo ay xawaaladuhu muddo ka badan soddon sano laf-dhabar u ahaayeen nidaamka maaliyadeed ee aan rasmiga ahayn ee Soomaaliya, haddana qaar badan ayaa hadda ganacsigoodii u beddelay bangiyo, taas oo qayb ka qaadatay kobaca waaxda bangiyada labadii sano ee la soo dhaafay. Xawaaladaha soo haray ayaa wajahay caqabado badan oo isku dhafan, kuwaas oo ay ku jiraan u hoggaansanaanta liidata ee lxiriirta  ka hortagga lacagaha sharci darrada ah/ hirgalin la'aanta shuruucda ka dhanka ah maalgelinta argagixisada (AML/CFT), maqnaanshaha nidaam wax ku ool ah oo ku salaysan habraacyada Ogow-macmiilkaaga iyo sida oo kale ku xidhnaan la'aanta nidaamka maaliyadeed ee caalamiga ah.[55] Caqabadahaas ayaa xannibay shaqada iyo kobaca xawaaladaha, oo weli muhiim u ah shacabka Soomaaliyeed, maadaama ay fure u yihiin fududeynta xawaaladda lacagaha oo ah halbowlaha dhaqaalaha Soomaaliya.

54. CBS, list of licensed money transfer businesses. https://centralbank.gov.so/licensing-supervision-department/
55. HIPS interview, 2023.

In ay xawaaladuhu si habboon ugu hoggaansamaan shuruucda dalka iyo kuwa caalamiga ah, ayaa u baahan dadaallo wadajir ah sida in la hagaajiyo awoodda shaqaalaha xawaaladaha iyo in la kobciyo  nidaamyada aqoonsiga si loo horumariyo habraacyada Ogow macmiilkaaga iyo sida oo kale fulin dowladeed oo wax ku ool ah, taas oo ka dhan ah fududaynta hawlaha maaliyadeed ee sharci darrada ah. Khubarada dhaqaaluhu waxa ay aamminsan yihiin in wax ka qabashada arrimaha u ku saabsan in ay xawaaladuhu si habboon ugu hoggaansamaan shuruucda iyo guud ahaan waaxda bangiyada, ayaa si aan kala sooc lahayn ugu xidhan horumarinta nidaamka aqoonsiga qaranka, kaas oo muhiim u ah in la aqoonsado macaamiisha iyo fal-dembiyeed kasta oo dhaca.

### 3.2.6 Bangiyada Ajanabiga ah

> *Jaangooyayaasha siyaasadda, aqoonyahanka iyo bangiyada dalka ayaa si weyn ugu kala qaybsamay ruqsad siinta bangiyada ajanabiga ah*

Sannadkii 2022, waxa uu Bangiga Dhexe ee Soomaaliya ruqsad siiyay laba bangi oo ajanabi ah: labada bangi oo kala ah Turkish bank Ziraat iyo Egypt’s Banque Misr ayaa noqday bangiyadii ugu horreeyay ee caalami ah ee ruqsad ay Soomaaliya kaga hawlgalaan hela tan iyo markii uu Siyaad Barre qarameeyay dhammaan bangiyada ajanabiga ah. Jaangooyayaasha siyaasadda, aqoonyahanka iyo bangiyada dalka ayaa si weyn ugu kala qaybsamay ruqsad siinta bangiyada ajanabiga ah. Qayb ayaa u arkay tallaabo xilligeedii la qaaday iyo faa’iido wax ku ool ah, maadaama ay kor u qaadayso helitaanka maalgashiga iyo carbinta koboca dhaqaalaha. Qaybta kale ayaa rumaysnaa in ay tani halis ku tahay goboca waaxda maaliyadeed ee dhaladka ah(domestic).

Marka loo eego siyaasadda guud, waxa ay bangiyada ajnabiga ahi gacan ka geysan karaan dadaallada maalgashiga iyo horumarinta - fududaynta isdhexgalka ganacsiga caalamiga ah, kobcinta hufnaanta waxsoosaarka iyo anshaxa suuqa, iyo bixinta helitaanka daymaha iyo waxsoosaarka iyo adeegyada aad u casrisan. Sida laga soo xigtay Ross Levine, bangiyada ajanabiga ah ee waddanka soo galaya waxa ay hagaajiyaan helitaanka habsami-socodka raasamaalka gudaha, waxa ay fududeeyaan tayada iyo helitaanka adeegyada maaliyadeed ee casriga ah ee la xiriira xirfadaha bangiyada iyo tignoolajiyadda, carbinta tartanka suuqyada maaliyadeed ee gudaha iyo hagaajinta siyaasadda gudaha iyo kaabayaasha dhaqaalaha - taas oo iyaduna kor u qaadaysa horumarinta maaliyadda gudaha.[56] Masuuliyiinta dowladdu waxa ay rajaynayaan in ruqsad siinta bangiyada ajanabiga ahi noqon karto jid loo marayo ka-qaybgalka nidaamka maaliyadeed ee caalamiga ah iyo isu-socodka suuqyada dhaqaalaha, maadaama bangiyada waddanka ay dhibaato ka haysato u hoggaansanaanta habraacyada iyo halbeegyada maaliyadeed ee caalamiga ah.[57]

56. Levine, R. (1996). Foreign banks, financial development, and economic. International financial markets: Harmonization versus competition, 224.
57. HIPS interview with CBS senior official, 2022.

*Bangiyada maxalliga ah ayaa aamminsan in ay u nugul yihiin tartanka dibadda, maadaama ay bangiyada ajanabiga ahi raasamaal ku filan, oo kooda ka sarreeya*

Si kastaba ha ahaatee, bangiyada maxalliga ah ayaa walaac ka muujiyay go'aanka dowladda ay ruqsadaha ku siisay bangiyada Ziraat iyo Banque Misr. Waxa ay sheegeen in aanay jirin shuruuc loo dajiyay maamulka sida ay u shayqayn doonaan bangiyada ajanabiga ahi iyo shuruudo kala soocaya adeegyadooda iyo adeegyada ay hadda bixiyaan bangiyada maxalliga ahi. Bangiyada maxalliga ah ayaa aamminsan in ay u nugul yihiin tartanka dibadda, maadaama ay bangiyada ajanabiga ahi raasamaal ku filan, oo kooda ka sarreeya.[58]

Maamulka Bangiga Dhexe ee Soomaaliya oo lagu waraystay warbixintan ayaa sheegay in ruqsada la siiyo bangiyada ajanabiga ah ee hawlahoodu ku xaddidan yihiin maalgalinta ganacsiga baaxadda weyn.[59] Bangiyada ajanabiga ah waa ka mamnuuc in ay bixiyaan maalgalin qofeed, furitaankoodana waxa looga baahan yahay raasamaal aan ka yarayn $20 milyan, halka kuwa maxalliga ah furitaankooda looga baahan yahay $5 milyan, kuwaas oo haysta ruqsad caalami ah, oo u oggolaanaysa in ay bixiyaan maalgalinta shaqsiga iyo maalgalinta ganacsiga-labadaba.[60]

Qaar ka mid ah khubarada lagu waraystay warbixintan ayaa aamminsan in bangiyada ajanabiga ahi kor u qaadaan waxsoosaarka bangiyada maxalliga ah, iyaga oo laga dhaxlay khibrad iyo khayraad, si la mid ah sida diyaaradaha caalamiga ahi u qaabeeyeen shirkadaha diyaaradaha maxalliga ah.[61] Bangiyada ajanabiga ahi waxa ay abuuri karaan tartan caafimaad qaba, waxaanay wanaajin karaan adeegyada maaliyadda, taas oo macaamiisha u horseedaysa adeeg wanaagsan, korna u qaadaysan helitaanka deynta iyo hoosna u dhigaysa khidmadaha wax kala iibsiga. Tusaale ahaan, tan oo kale waxa lagu arki karaa wadamada Ghana iyo Kenya. Bangiyada ajanabiga ah ee Ghana ku yaalla ayaa door muhiim ah ka ciyaaray kor u qaadista soo celinta hantida bangiyada maxalliga ah. Tartanka ay soo bandhigeen bangiyada ajanabiga ahi ayaa bangiyada maxalliga ah ku qasbay in ay kor u qaadaan waxqabadkooda iyo hufnaantooda shaqo, taas oo keentay in la gaaro natiijooyin maaliyadeed oo horumarsan.[62] Waxa kale oo uu tartankani kor u qaaday hal-abuurnimada iyo hirgalinta habraacyada ugu wanaagsan, kuwaas oo horseedaya in ay bangiyada maxalliga ku sii jiri karaan tartanka suuqa.

Sida oo kale, soo galitaanka bangiyada ajanabiga ahi waxa ay Kenya u horseedeen horumar la xiriira dhanka bangiyada maxalliga ah. Markii ay bangiyada maxalliga ahi arkeen in suuqa lagula tartamayo waxa ay go'aansadeen in ay kobciyaan hawlgalladooda, oo ay dhimaan qiimahooda, korna u qaadaan tayada adeegyadooda. Tani waxa ay keentay hoos u dhac ku yimid xaddiga amaahda, taas oo maalgelinta ka dhigaysa mid ay ganacsatada iyo shaqsiyaadkuba awoodi karaan.[63]

58. HIPS interview, 2023.
59. CBS regulation (Ban Licensing), revised version March 2022.
60. HIPS interview with CBS official.
61. HIPS interview, 2023.
62. Acheampong, 2013. The effects of foreign bank entry on financial performance of domestic-owned banks in Ghana. The International Journal of Business and Finance Research, 7(3), 93-104.
63. Oino & Ukaegbu, 2014. The impact of foreign bank entry on domestic banking in a developing country the Kenyan perspective. Banks and Bank Systems, 9(1), 28-35.

“

*waa muhiim in Bangiga Dhexe ee Soomaaliya uu u halgamo isku dheellitirka ku salaysan in bangiyada ajanabiga ah lagu dhiirigeliyo soo galitaanka dalka iyo hubinta xasilloonida maaliyadeed iyo la socodka*

Si kastaba ha ahaatee, waa muhiim in Bangiga Dhexe ee Soomaaliya uu u halgamo isku dheellitirka ku salaysan in bangiyada ajanabiga ah lagu dhiirigeliyo soo galitaanka dalka iyo hubinta xasilloonida maaliyadeed iyo la socodka. Nidaamyo sharciyeed oo ku habboon hawlaha bangiyada iyo habraacyo la gula soconayo dhaqdhaqaaqyadooda waa in la sameeyaa, si loo maareeyo khataraha ka iman kara, loona ilaaliyo xasilloonida nidaamka bangiyada maxalliga ah. Arrimahan waxaa ka mid ah in khatarta loo qiimeeyo si wax ku ool ah, in shuruudo maangal ah loo sameeyo xaddiga raasamaalka, iyo in la la socdo hawlaha bangiyada shisheeye, si loo ilaaliyo danaha macaamiisha iyo guud ahaan xasilloonida maaliyadeed ee dalka.

# 4. Horumarinta waaxda bangiyada Soomaaliya

Inkasta oo la ballaadhiyey waaxda bangiyada Soomaaliya, haddana waxa ay la kulantay caqabado tiro badan. Caqabadahaas waxa ka mid ah sharuucda maaliyadda dalka oo ah mid daciif ah, nidaamka maaliyadeed ee caalamiga ah oo meesha ka saaraya khataraha iman kara, maqnaanshaha aqoonsi qaran, si loogu hoggaansamo shuruucda ka hortagga lacagaha bilaa sharciga ah, itaal darro (ay ka mid yihiin la'aanta shaqaale xirfad leh), wadashaqeyn la'aanta bangiyada iyo hay'adaha sharciga iyo amni-darrada, taas oo caqabad ku noqotay ballaarinta waaxda.

## 4.1 Deegaan sharci oo liita

Kadib markii la saaasaasay Bangiga Dhexe ee Soomaaliya sannadkii 2009, waxa la dajiyay xeerar iyo shuruuc aasaasi ah oo ay ka mid yihiin Xeerka Hay'adaha Maaliyadda. Xeerkan ayaa ogolaanaya in Bangiga Dhexe ee Soomaaliya diiwaangaliyo, maamulo, oo uu la socdo hawlaha bangiyada ganacsiga iyo hay'adaha kale ee maaliyadda. Soomaaliya oo teegeero ka helaysa saaxiibadeeda caalamka ayaa ansaxisay xeerka la dagaallanka lacagta sharci darrada ah sannadkii 2016, si ay u qiimayso, una maarayso khataraha la xidhiidha lacagta sharci darrada ah iyo lacagaha u kala goosha argagixisada. Xeerarkan ayaa ahaa tallaabo wax ku ool ah oo looqaaday dhanka dibuhabaynta nidaamka maaliyadeed ee dalka oo ah mid aan rasmi ahayn.

> Si kastaba ha ahaatee, dhibtu waxa ay ka jirtaa fulinta xeerarkan, sababta oo ah nidaamka sharci ee dalka ayaa ah mid fadhiid ah

Si kastaba ha ahaatee, dhibtu waxa ay ka jirtaa fulinta xeerarkan, sababta oo ah nidaamka sharci ee dalka ayaa ah mid fadhiid ah. Waxa jira tuhunno la xidhiidha in ay qaar ka mid ah xawaaladaha iyo bangiyada ganacsigu fuliyaan hawlo la xiriira lacagta sharci darrada ah iyo maalgalinta argagixisada. Ka qaybgalayaasha daraasaddan ayaa sheegay in al-Shabaab lacagta dhigato, kuna dirato bangiyada maxalliga ah. Kaqaybgale ayaa yidhi, "Dhammaantood ma odhanayo laakiin bangiyada qaar ayaa fududeeya lunsiga lacagaha ay musuqmaasuqaan siyaasiyiinta iyo hormuudka bulshadu".

Inkasta oo uu Bangiga Dhexe ee Soomaaliya ku tallaabsaday horumar la xidhiida shuruucda iyo qaab-dhismeedka bangiyada, haddana xeerar badan oo muhiim ah ayaan wali la dajinin. Tusaale ahaan, bangiyada Soomaaliya badankoodu waxa ay bixiyaan adeegyada bangiyada Islaamiga ah sida Mushaarakah iyo Mudaarabah, balse ma laha hagitaanno jaan-go'an oo ku ilaaliya isticmaalka iibabka ku salaysan shareecada Islaamka. Abuuritaanka xeerar bangi oo Islaami ah ayaa ah mid ka mid ah siyaabaha ugu muhiimsan ee dalka laga dhisi karo bangiyo islaami ah, oo wax ku ool ah.

Warbixin ay Hay'adda Lacagta Adduunku soo saartay sannadkii 2021, ayaa lagu xusay in aanay jirin habraacyo wax kala xakameeya oo maxalli ahi, gaar ahaan dibu-eegis lagu sameeyay qawaaniintii Islaamiga ahayd ee hore dalku u lahaa.[64] Taasi waxa ay keeni kartaa in aan loo hoggaansamin shuruucda ku taxalluqda habka ay u shaqeeyaan bangiyada Soomaaliya.[65] Gudoomiyaha Ururka Bangiyada Soomaaliya ayaa sheegay in bangiyada ku shaqeeya shareecada Islaamku gacan ka gaysan doonaan yaraynta khatarta la xiriirta wax soo saarka iyo adeegyada bangiyada Islaamiga ah, islamarkaana ay hagaajinayaan tayada nidaamka maaliyadeed ee dalka.[66]

## 4.2 Yaraynta halista iyo xoojinta nidaamka maaliyadeed ee caalamiga ah

Bangiyada iyo xaawaladaha Soomaaliya ayaa nidaamka maaliyadeed ee caalamiga ah kala kulmay noocyo kala duwan oo takoor ah tan iyo markii la weeraray Xaruntii Ganacsiga Adduunka (World Trade Center) 11 September, 2001. Tan ayaa caqabad ku noqotay in hay'adaha maaliyaddu xidhiidh la sameeyaan bangiyada ajanabiga ah, gaar ahaan Maraykanka, Boqortooyada Ingiriiska iyo dalalka kale ee Yurub, halkaas oo la hakiyey xisaabaadka iyo adeegyada bangiyada ee kuwooda u dhigma.

---

64. See IMF Report, 2021. Technical Assistance Report-Bank Supervision and Regulation of Somalia. available at, https://www.imf.org/en/Publications/CR/Issues/2021/03/31/Somalia-Technical-Assistance-Report-Bank-Supervision-and-Regulation-50315
65. HIPS interview
66. Reuters, 2015. U.S. bank ending of Somalia money transfers to have a catastrophic impact. https://www.reuters.com/article/uk-usa-somalia-remittances-idUKKBN0L726A20150203

*ballaadhinta waaxda maaliyadda ay caqabad ku tahay aragtida qaldan ee uu nidaamka maaliyadeed ee caalamiga ahi ka haysto bangiyada Soomaaliya*

Bangiyada Soomaaliya iyo macaamiishooda ayaa si weyn ugu tiirsan gacanta saddexaad ee bangiyada caalamiga ah sida Bangiyada Ganaacsiga ee ka shaqeeya xawilaadaha lacagaha iyo adeegyada bangiyada. Si kastaba ha ahaatee, bangiyada fadhigoodu yahay Maraykanka ayaa lagu waajibiyey halis yarayn xad dhaafka ah, taas oo keentay in ay istaagaan adeegyadii xawaaladuhu.[67] Arrintan ayaa saameyn ku yeelatay qoysas badan oo Soomaaliya ku nool, kuwaas oo xawaaladuhu lafdhabar u yihiin noloshooda. Qaar ka mid ah ka qaybgalayaasha daraasaddan ayaa sheegay in ballaadhinta waaxda maaliyadda ay caqabad ku tahay aragtida qaldan ee uu nidaamka maaliyadeed ee caalamiga ahi ka haysto bangiyada Soomaaliya, taas oo sahlaysa in lacago baaxad lehi u kala gooshaan bangiyada maxalliga ah.

Iyada oo ay jiraan shuruuc iyo qawaaniin cusubi, ayaanay haddana bangiyada caalamku wali kalsooni ku qabin dhiggooda Soomaaliya, taas oo caqabad ku ah kobaca waaxda maaliyadda Soomaaliya. Sarkaal ka tirsan Bangiga Dhexe ee Soomaaliya ayaa sheegay in iyada oo ay Soomaaliya qaadatay nidaamka la dagaallanka lacagta sharci darrada ah, islamarkaana samaysay unugga sirdoonka maaliyadda, oo ah hay'ad loogu talagalay in lagu ogaado, laguna hor istaago lacagaha sharci darrada ah iyo maalgelinta argagixisanimada, ay hadda wali adag tahay in ay waaxda maaliyadda Soomaaliya dib ula jaanqaaddo nidaamka maaliyadeed ee caalamiga ah.[68]

## 4.3 La'aanta Aqoonsi Qaran

*Aqoonsiga qaran ayaa ah hab la aqbali karo oo lagu heli karo adeegyada maaliyadeed ee adduunka oo dhan -halkaas oo ay ka jirto habraacyada ogow macmiilkaaga (KYC) iyo kuwa aqoonsiga macmiilka ayaa u gogolxaara furitaanka akoonnada bangiga*

La'aanta aqoonsi qaran ayaa ah caqab kale oo weyn oo soo foodsaartay waaxda bangiyada. Aqoonsiga qaran ayaa ah hab la aqbali karo oo lagu heli karo adeegyada maaliyadeed ee adduunka oo dhan -halkaas oo ay ka jirto habraacyada ogow macmiilkaaga (KYC) iyo kuwa aqoonsiga macmiilka ayaa u gogolxaara furitaanka akoonnada bangiga. Soomaaliya ma laha aqoonsi qaran oo dhammaystiran. Bangiyada Soomaaliya ayaa iminka habab kala duwan u isticmaala xaqiijinta qofka sida shahaadooyinka dhalashada, baasaboorrada iyo ruqsadaha darawalnimada.

Sannadkii 2020, ayuu madaxweynaha DFS, Maxamed Cabdillaahi Farmaajo ansixiyay Xeerka Aqoonsiga Qaranka si loo aasaaso Hay'adda Diiwaangelinta & Aqoonsiga Dadweynaha Soomaaliya, taas oo muwaadiniinta siinaysa kaararka aqoonsiga iyo dadka sharciga ku deggan Soomaaliya. Si kastaba ha ahaatee, madaxweynaha hadda Xasan Shiikh Maxamuud ayaa sharcigan dib ugu celiyay golaha wasiirrada, isaga oo faray in ay wax ka beddel ku sameeyaan.

67. HIPS interview
68. HIPS interview with the Somali Bankers Association CEO.

Bishii Jannaayo, 2023 ayay Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Faderaalka iyo Dibu-heshiisiinta baarlamaanka horgeysay sharci cusub oo ku salaysan Diiwaangelinta & Aqoonsiga Dadweynaha Soomaaliya, kaas oo soo baxay bishii Maaraj 2023, waxaana sharcigaas saxiixay madaxweynaha Soomaaliya.

## 4.4 Karti la'aan

*"Shaqaale la'aantu waa mid ka mid ah caqabadaha ugu waaweyn ee ragaadiyey Bangiga Dhexe ee Soomaaliya, iyada oo lagu qiyaasay in uu bangigu haysto wax ka yar kala badh shaqaalaha uu uga baahan yahay daboolista baahiyihiisa. Shaqaale yaraanta waxa keenay mushaharka bilaa gorgortanka ah ee la bixiyo*

Marka laga yimaaddo dhammaan dadaallada ay saaxiibada caalamku ku taageerayaan Bangiga Dhexe ee Soomaaliya, oo ay ku jiraan Hay'adda Lacagta Adduunka iyo Bangiga Adduunku, wali waaxdu waxa ay wajahaysaa caqabado waaweyn oo la xiriira awoodda hay'adda. Marka loo eego, dhinaca dowladda, waxa ay Hay'adda Lacagta Adduunku siisay kaalmooyin farsamo oo xoojinaya awoodda Bangiga Dhexe ee Soomaaliya si uu u kormeero hawlaha iyo shaqooyinka bangiyada. Si kastaba ha ahaatee, in la helo kormeer goobeed waxtar leh waxa caqabad ku noqday maqnaanshaha shaqaale xirfad sare iyo aqoon fiican u leh labada cilmi ee Shareecada Islaamka iyo Maaddiga  ku saabsan hawlaha bangiyada. Shaqaale la'aantu waa mid ka mid ah caqabadaha ugu waaweyn ee ragaadiyey Bangiga Dhexe ee Soomaaliya, iyada oo lagu qiyaasay in uu bangigu haysto wax ka yar kala badh shaqaalaha uu uga baahan yahay daboolista baahiyihiisa. Shaqaale yaraanta waxa keenay mushaharka bilaa gorgortanka ah ee la bixiyo. Si kastaba ha ahaatee, waxa xusid mudan in uu Bangiga Dhexe ee Soomaaliya dhowaan shaqaaleysiisey saddex agaasime iyo hal maareeye, kuwaas oo uu mushaharkooda bixiyo Bangiga Adduunku. Sida oo kale, xifrad la'aan shaqaale ayaa wiiqday maamulidda hawlaha maalin laha ah ee uu bangigu ku foogan yahay. Agaasimaha Ururka Bangiyada Soomaaliya ayaa yidhi, "la'aanta shaqaale xirfad leh oo ka hawlgala bangiyada casriga ah sida halbeegyada xisaabaadka, tabinta iyo dhijitaalaynta adeegyada maaliyadeed ee la bixinayo ayaa caqabad ku ah kobaca bangiyada Soomaaliyeed."[69] In kasta oo bangiyada qaar ay bixiyaan barnaamijyo tababbar oo dal iyo dibadba leh si loo mideeyo maamulka, iibinta adeegyada dhijitaalka ah, daryeelka macaamiisha iyo maaraynta halista, haddana aqoonta isku dhafan ee looga baahan yahay hawlaha bangiyada oo aad u kooban ayaa caqabad ku ah ku waaxda bangiyada Soomaaliya. Tani waxa ay muujinaysaa in isbeddelka bangiyada Soomaaliya u baahan yihiin waxqabad ku salaysan horumar xirfadeed.

---

69. Rother, M. B., Pierre, M. G., Lombardo, D., Herrala, R., Toffano, M. P., Roos, M. E., ... & Manasseh, M. K. (2016). The economic impact of conflicts and the refugee crisis in the Middle East and North Africa. International Monetary Fund. https://www.elibrary.imf.org/view/journals/006/2016/008/article-A001-en.xml

## 4.5 Amniga iyo Qalalaasaha Siyaasadda

> *Warbixin ay soo saartay Hay'adda Lacagta Adduunku sannadkii 2020, ayaa sida oo kale xaqiijisay in khilaafaadka iyo amni darradu hoos u dhigaan dakhliga bangiyada, waxaanay horseedaan in hawlaha maamulka loo waayo dhaqaale ku filan, taas oo saamayn xun ku yeelata hantida iyo qoondaynta daymaha*

Xaaladda amniga iyo xasillooni darrada ayaa caqabad ku noqday in adeegyada bangiyadu ku faafaan deegaannada miyiga, gaar ahaan dhulka ay al-Shabaab xukunto. Warbixin ay sannadkii 2016 soo saareen Rother, Pierre, Lombardo, Herrala, Toffana, Roos iyo Manasseh ayaa lagu ogaaday in khilaafaadku wiiqeen waxqabadka maaliyadeed, maadaama oo aanay bangiyadu joogtayn karin dhexdhexaadinta iyo nidaamyada lacag-bixinta.[70] Warbixin ay soo saartay Hay'adda Lacagta Adduunku sannadkii 2020, ayaa sida oo kale xaqiijisay in khilaafaadka iyo amni darradu hoos u dhigaan dakhliga bangiyada, waxaanay horseedaan in hawlaha maamulka loo waayo dhaqaale ku filan, taas oo saamayn xun ku yeelata hantida iyo qoondaynta daymaha.[71]

Shacabka Soomaaliyeed badankoodu ma haystaan adeeg bangi. Sahanka Miisaaniyadda Qoyska Soomaaliya ee Xafiiska Tirakoobka Qaranka 2022 (SIHRS) ayaa muujinaysa in dadka ka weyn da'da 15 ay boqolkiiba 8.8 kali ahi leeyihiin akoonno bangi, kuwaas oo ay badankoodu joogaan magaalooyinka. Si kastaba ha ahaatee, boqollaydaas ayaa hoos u sii dhacda meelaha miyiga ah iyo gobollada reer guuraaga, iyada oo dadkaas ay boqolkiiba 7.7 iyo boqolkiiba 2.0 kali ah leeyihiin akoonno bangi, siday u kala horreeyaan.[72] Bangiyadii lagu waraystay cilmibaadhistan ayaa ka maagay in ay laamo ka furtaan deegaannada aan amniga ahayn, ee ay rabshaduhu ka aloosan yihiin. Bangiyada IBS iyo Premier, oo ka mid ah bangiyada bixiya adeegyada casriga ah sida ATMs- ayaa dhowaan laamo ka furtay magaalooyinka waaweyn, balse waxa ay ka cabsi qabaan in ay ku baahaan deegaannada miyiga. "Haddii aan wax laga qaban, xaaladaha amni darrada ah waxa ay keeni karaan khataro ba'an oo ku aaddan jiritaanka iyo badbaadada bangiyada gaarka loo leeyahay iyo sida oo kale, guud ahaan waxqabadka waaxda," ayuu yiri maamulaha hal bangi.

# 5. Gunaanad

Waaxda maaliyadda Soomaaliya ayaa u kala baxda afar qaybood oo kala duwan: bangiyada ganacsiga, hay'adaha maaliyadda yaryar, lacagta moobillada iyo xawaaladaha. Inkasta oo ay waaxda bangiyadu si tartiibtartiib ah u bullaalayso, oo uu Bangiga Dhexe ee Soomaaliya dib u helay awoodda bixinta ruqsadaha, dabagalka iyo kormeerka bangiyada, haddana boqolkiiba 8.8 kali ah ayaa dadweynaha leh akoonno bangi. In ka yar boqolkiiba 0.5 ayaa si firfircoon u isticmaala akoonnadaas. Caqabadaha kale ee hortaagan horumarka waaxda bangiyada waxa ka mid ah qaab-dhismeedka sharciga oo ah mid liita, maqnaanshaha aqoonsiga qaranka, kordhinta ad-adayga iyo xoojinta xakamaynta nidaamka maaliyadeed ee caalamiga ah, helitaanka daymaha oo ah mid isna liidata, amni darrada iyo qalalaasaha siyaasadda.

---

70. IMF, 2020. The Impacts of Conflict and Political Instability on Banking Crises in Developing Countries. https://www.elibrary.imf.org/view/journals/001/2020/041/article-A001-en.xml
71. SNBS, 2023. Somalia Integrated Household Budget Survey. https://api.nbs.gov.so/wwwroot/Publications/188d169e4c294911a1e0c58ab00fd390.pdf
72. Ibid

# 6. Talabixinno Siyaasadeed

1. Hagaajinta halbeegyada sharciga, si loo taageero in nidaamka maaliyadeed noqdo mid sumcad iyo waxtar leh, waa in la sameeyo sharci cusub, islamarkaana la fuliyo xeerarka jira. Sharciyada muhiimka ah sida Sharciga Hay'adaha Maaliyadda, Sharciga La dagaallanka Lacagta Sharci darrada ah iyo ka Hortagga Maalgelinta Argagaxisada, iyo sida oo kale Sharciga Ganaaxyada Maaliyadda ayaa u baahan in sameeyo istaraatiijiyado fulineed oo leh yoolal cad iyo hadafyo la cabbiri karo. Marka la eego awoodda dhaqaale iyo farsamada liidata ee DFS, waa in ay saaxiibbada caalamku gacan ka gaystaan hirgelinta xeerarka maaliyadda iyo diyaarinta hindise sharciyeeddada harsan, iyada oo arrintaas loo waajahayo hannaan loo dhan yahay. Si hirgelintu u guulaysato, waxa muhiim ah in la tixgeliyo aragtida bangiyada iyo daneeyayaasha kale ee maaliyadda.

2. Dowladdu waa in ay samaysaa sharci lacageed oo Islaami ah, kaas oo lagu nidaaminayo hawlaha bangiyada islaamiga ah, islamarkaana suurageliya in wax kala iibsiga loo fuliyo si waafaqsan nidaamka shareecada, iyo sida oo kalena waafaqsan halbeegyada maamulka hawlaha bangiyada islaamiga ah.

3. Soomaaliya waa in ay samaysataa lacag cusub, si ay u yarayso ku tiirsanaanta lacagta doollarka Maraykanka. Maadaama dhaqaalaha dalku aad ugu tiirsanyahay lacagta doollarka ah, waxaa ku gedaaman haliso dhowr ah, oo ay ka mid yihiin la'aanta siyaasad lacageed, dheef lun, kor u kaca halisaha lacagta caddaanka ah, haddaba waa in ay Dowladda Faderaalka Soomaaliya xoogga saartaa sidii ay dib ugu samayn lahayd lacag cusub. Kadibna ay u tajin lahayd shuruuc, istaraatiijiyado iyo siyaasado kor u qaadaya in lacagta Soomaaliya ka isticmaal badato doollarka Marayka.

4. Kor u qaadista awoodda hay'adaha dhaqaalaha sida Bangiga Dhexe ee Soomaaliya iyo sida oo kale hay'adaha garsoorka ee taageera hirgelinta hababka kormeerka iyo qaab-dhismeedka sharciga. Tan waxa ka mid ah qaadashada shaqaalaysiinta ku saleysan mudnaanta iyo bixinta tababarro iyo barnaamijyo horumarineed. Ansixinta shuruucda iyo qorshayaasha siyaasaddu, ma kafaynayaan haddii aanay waaxda hay'adaha dadweynuhu ku taakulayn cudud iyo awood bulsho.

5. Waa in ay DFS dedejisaa hannaanka lagu samaynayo aqoonsi qaran, si dadka aan lahayn akoonno bangi u helaan adeegyo maaliyadeed iyo sida oo kale ilaalinta iyo yaraynta halisaha la xidhiidha xatooyada, lacagta sharci darrada ah iyo maalgelinta argagixisada. Daneeyayaasha bangiyada ayaa sheegay in maqnaanshaha aqoonsiga qaranku caqabad weyn ku tahay in Soomaaliya dib uga mid noqoto nidaamka maaliyadeed ee caalamka. Sannadahanba dood ku saabsan yaa ah muwaadin Soomaaliyeed, ayaa wiiqday geeddi-socodka waaxda bangiyada, sidaa darteed, ka qaybgalayaasha daraasaddu waxa ay soo jeediyeen in la sameeyo aqoonsi maaliyadeed oo kumeelgaar ah, taas oo lagu ladhi karo aqoonsiga qaranka, marka la sameeyo.

6. Bangiga Dhexe ee Soomaaliya waa in uu horumariyaa nidaamka lacag-bixinta qaranka, isaga oo hirgalinaya mareegta lacag-bixinta iyo soo gudbinta shatiga lacag-bixinta. Nidaamka Lacag-bixinta Qaranka ee dhowaan la sameeyay ayaa ahaa tallaabo weyn oo loo qaaday in la helo nidaam lacag-bixineed oo hufan, oo la isku halayn karo. Si kastaba ha ahaatee, warbixintani waxa ay ogaatay in nidaamka lacag-bixineed ee hadda jiraa uu ku salaysan yahay hawl-gacmeed(manual), oo uu la xiriiro wareeg dheer oo hubin iyo lacag-bixin isugu jira, taasina ay kor u qaadday halista ku iman karta nidaamkan. Sidaas darteed, waa in ay masuuliyiinta DFS marka kowaad dardargaliyaan ansaxinta Xeerka Lacag-bixinta Qaranka. Haddaba, marka kowaad, waa in ay masuuliyiinta DFS dardargeliyaan soo saarista Xeerka Lacag-bixinta Qaranka si loo ilaaliyo habsami-socodka nidaamka lacag bixinta. Marka labaad, iyada oo ay ku lammaantahay qaab-dhismeed sharci oo xooggan, waa in ay saammilayda suuqyadu helaan farsamooyinka iyo awood ay uga baahan doonaan maamulka halista, si ay awood ugu yeeshaan fahanka doorkooda iyo masuuliyadahooda, iyada oo lagu salaynayo mareegta lacag-bixinta qaranka.

7. DFS oo kaashanaysa saaxiibada horumarinta caalamiga ahi, waa in ay ka hortagtaa caqabadaha xaddidaya helitaanka maalgelinta ganacsatada Soomaaliyeed iyo kuwa ku lug leh hawla waaxda waxsoosaarka. Tani waxa ay u baahan tahay sharci ku salaysan maalgelinta kooban, si loo helo sharci qumman oo aasaasi ah, kaas oo ay ku lammaan tahay horumarinta xafiiska macluumaadka deymaha iyo baahinta helitaanka amaahda ganacsiga, sida beeraha. Saaxiibada horumarinta caalamiga ah, waa in lagu dhiirrigeliyaa in ay bixiyaan mashaariic maaliyadeed oo lagu kobcinayo daymaha bangiyada maxalliga ah.

8. Maalgelinta cududda shaqaalaha bangiyada. Warbixintani waxa ay daaha ka qaadaysaa in tayo la'aanta shaqaaluhu caqabad ku tahay horumarka. Waaxda maaliyaddu, kuma tallaabsan karto horumar wanaagsan, haddii aanay helin shaqaale xirfad iyo aqoon leh. Kobcinta xirfadaha iyo farsamada ay ku hubaysan yihiin shaqaalaha waaxda bangiyadu, ayaa ah baahi korodhkeedu xawli ku socdo, waana mid ka mid ah waxyaalaha mudnaanta sare u leh waaxda maaliyadda. Haddaba waxa taas lagu gaadhi karaa in kor loo qaado wada shaqaynta u dhaxaysa bangiyada ganacsiga, dowladda iyo xarumaha tacliinta sare, si loo helo kaadiriin ku hubaysan aqoonta maaliyadda casriga ah iyo xirfadaha looga baahan yahay bangiyada. Iskaashiga noocan oo kale ahi waxa uu kor u qaadi doonaa shaqaalaysiinta ardayda soo qalinjabisay, waxaanu u sahlayaa in ay daboolaan baahida shaqaale ee ku gadaaman waaxda bangiyada.

9. Cilmibaadhistan ayaa shaaca ka qaadday in ay bangiyada ganacsiga Soomaaliya xoogga saaraan maalgelinta hantida maguurtada ah. Haddaba, haddii ay waaxdu burburto, tani waxa ay dhalin doontaa jaahwareer dhaqaale. Sidaa darteed, waa in ay bangiyada ganacsigu yareeyaan maalgelinta hantida maguurtada ah, islamarkaana ballaadhiyaan maalgelinta horumarinta beeraha iyo ganacsiga hal-abuurka leh.

10. Bangiyadu waa in ay yareeyaan u banbixidda halisaha ku gadaaman xidhiidhada gacanta saddexaad, waana in ay u hoggaansamaan shuruucda uu Bangiga Dhexe ee Soomaaliya u dajiyey xaddidaadda u banbixidda halisaha, si ay uga fogaadaan khataraha ku gadaaman nidaamkan. Haddii lagu guuldarraysto in sidaas la sameeyo, waxa ay horseedi doontaa haliso xooggan. Sida oo kale, waa in uu Bangiga Dhexe ee Soomaaliya mudnaan gaara siiyaa in habraacyada muhiimka ah si weyn loogu bayaamiyo bangiyada ganacsiga.

11. Bangiyada ganacsigu waa in ay si dhab ah uga taxadaraan halisaha ku xeeran hawlaha shaqo, haddii kale waxa lumaysa kalsoonida ay dadku ku qabaan waaxda bangiyada, taasina waxa ay caqabad ku noqonaysaa rajada laga qabo baahinta iyo horumarinta waaxda maaliyadda Soomaaliya. Waxa kale oo iyaduna lagama maarmaan ah in bangiyadu mudnaanta siiyaan aasaaska istaraatiijiyado dowladeed iyo nidaamyo loo dhan yahay oo lagu maaraynayo halisaha ka dhanka ah waaxda maaliyadda, sida in la hirgaliyo hannaannada qiimaynta qaab-dhismeedka halisaha iyo xoojinta xakamaynta gudaha, si loogu guulaysto yaraynta halisaha suuragalka ah.

12. Bangiga Dhexe ee Soomaaliya, waa in uu hakiyaa ruqsad siinta bangiyada cusub, maadaama ay bangiyada hadda jiraa u baahan yihiin wakhti ay kula falgalaan halbeegyada gobolka. Waxa sida oo kale laga yaabaa in ay waaxda maaliyaddu u xanniban tahay xaaladda nugul ee uu dalkeedu la daalaadhacayo, Bangiga Dhexe ee Soomaaliyana u baahan yahay wakhti dheeraad ah oo u uu ku kobciyo khayraadkiisa iyo shuruucda maamulkiisa.

13. Bangiga Dhexe ee Soomaaliya, waa in uu kormeerkiisa ku saleeyaa dhaqangalinta habka halista ku qotoma (risk-based approach), halkii uu kormeerkiisa kaga salayn lahaa habka u hoggaansanaanta (compliance-based supervision). Habka halista ku qotoma ayaa horumarin xooggan u horseedi doona waaxda bangiyada, maadaama ay diiradda saari doonto bangiyada itaalka daran iyo kuwa aan bangiyada kale ku xidhnayn.

14. Bangiyada ajanabiga ah, waa in loo oggolaadaa in ay qabtaan dhammaan hawlaha bangiyada kale qabtaan, si loo dardargeliyo horumarinta adeegyada isu dhigma iyo kuwa sii kala wanaagsanba, lana abuuro dariiqyo ay adeegyadu u maraan dadka Soomaaliyeed. Tani waxa ay sii qurxinaysaa waaxda maaliyadda, waxaanay sii kaabaysaa rajada kobaca dhaqaale ee loo dhan yahay. Ikhtiyaarka kale waxa uu noqon karaa in bangiyada ajanabiga ah lagu xidho kuwa maxalliga ah ee Soomaaliya. Tani waxa ay siinaysaa awood weyn oo difaac uga noqonaysa halisaha maaliyadeed ka iman kara dalalkii ay ka yimaaddeen. Waxa kale oo ay xaqiijinaysaa in hawlgallada maxalliga ahi ay yeeshaan ballan-qaad raasamaal oo muddo fog iyo guddi maamul oo gaar ah, kuwaas oo leh isla xisaabtan iyo waajibaadyadii laga rabay hay'adda maxalliga ah.

HERITAGE
INSTITUTE

The Heritage Institute for Policy Studies
http://www.heritageinstitute.org